# LAHAANSHAHA, AHAANSHAHA IYO NOQOSHADA









Barashada Sanadaha Hore

Qaabka guud ee Australia

Waxaa soo saartay Wasaarada Waxbarashada ee Xukuumada Australia, Xiriirka Shaqaalaha iyo Shaqada ee Golaha Xukuumadaha Australia, warsaxaafadeed 3da Juulay 2008, Dib-u-qaabaynta – Buuxinta booska maran

© Commonwealth of Australia 2009

ISBN 978-0-642-77872-7

Shaqadaan waxay leedahay xuquuq daabaceed. Marka laga saaro isticmaal kasta oo la ogolaaday sida waafaqsan Xeerka Daabacada ee 1968, ma jirto qayb dib loo daabici karo sinaba iyada oo aan laga helin ogolaansho qoraalla Xukuumada Dhexe. Codsiyada iyo waxweydiimaha khuseeya dib u daabicida iyo xuquuqda waa in lagu hagaajiyaa Maamulka Xuquuqda Daabacadaa, Waaxda Xeer-ilaaliyaha Guud Xafiiska: Robert Garran Offices, National Circuit, Barton ACT 2600 ama waa in lagu soo qoraa: http://www.ag.gov.au/cca

# TUSMOOYINKA


HOR U DHAC 5

ARAGTIDA FOG EE BARASHADA ILMAHA 7

Qaabka guud ee asaaska 9

Barashada Carruurta 9

WAXBARASHADA ILMANIMADA HORE 11

MABAADIIDA 12

WAXQABADKA 14

NATIIJOOYINKA BARASHADA EE ILMAHA MARKUU DHASHO ILAA 5 JIR 19

Natiijada 1aad: Carruurtu waxay leeyihiin dareenka xoogan oo aqoonsiga 20

Carruurtu waxay dareemaan amaan, amni iyo kaalmayn 21

Carruurtu waxay yeeshaan madaxbanaanidooda soo koraysa, isku-tiirsanaanta, u dulqaadka iyo dareenka awoodeed 22

Carruurtu waxay yeeshaan kalsooni is-aqoonsi oo la garan karo 23

Carruurtu waxay bartaan is-dhexgalka wixii la xiriira hab leh taxadar, u damqasho iyo ixtiraam 24

Natiijada 2aad: Carruurtu waxay ku xiran yihiin doorna ka qaataan adduunkooda 25

Carruurtu waxay yeeshaan dareenka lahaanshaha kooxeed iyo bulshooyinka iyo fahamka xuquuqda la kala mudan yahay iyo masuuliyaadka muhiimka u ah ka qaybgal bulsho ee firfircoon 26

Carruurtu waxay u qushuucaan kala duwanaanta si ixtiraam leh 27

Carruurtu waxay fahmaan xaqsoorka 28

Carruurtu waxay noqdaan kuwa bulsha ahaan masuul ah waxayna muujiyaan ixtiraamka bay'ada 29

Natiijada 3aad: carruurtu waxay leeyihiin dareen xoogan oo samaqab ah 30

Carruurtu waxay noqdaan kuwa ku adag samaqabkooda shucuureed iyo bulsho 31

Carruurtu waxay qaataan masuuliyad siyaadaysa oo caafimaadkooda iyo samaqka jirkooda 32

Natiijada 4aad: Carruurtu way isku kalsoon yihiin waana bartayaal ka qaybqaata 33

Carruurtu waxay yeeshaan dabeecad barasho sida ka gungaarioda, iskaashiga, kalsoonida, hal abuurka, ka go'naanta, danaynta, ku dheganaanta, mala awaalka iyo jajabnaanta 34

Carruurtu waxay yeeshaan dhowr xirfadood oo kala duwan iyo habab la marayo sida xalinta khilaafka, waxweydiinta, tijaabinta, malaynta, cilmi baarista iyo baarista 35

Carruurtu waxay gudbiyaan oo qabatimaan xaalladaha kala duwan 36

Carruurtu waxay ka faaiidaystaan barashadooda iyaga oo ku xirmaya dadka, meesha, farsamooyinka iyo dabeecada iyo waxyaallaha la farsameeyey 37

Natiijada 5aad: Carruurtu  waa la xiriirayaal wanaagsan 38
Carruurtu waxay kula macaamilaan erayo iyo eray la'aan kuwa kale ujeedooyin kala duwan 40
Carruurtu waxay qabtaan qoraalla badan waxbayna ka bartaan qoraalladaas 41
Carruurtu waxay muujiyaan fikrado waxayna sameeyaan wax la fahmi karo iyaga oo isticmaalaya warbaahinta 42
Carruurtu waxay bilaabaan fahamka sida nadaamka astaamaha iyo calamaduhu u shaqeeyaan 43
Carruurtu waxay isticmaalaan macluumaad iyo teknoolojiga wada-xiriirka si ay u hellaan macluumaad, aragtida baarista waxayna masalaan fekerkooda 44

ERAYBIXINTA ERAYADA 45

LIISKA QORAALKA 47

# HOR U DHAC

Kani waa kii ugu horreeyey Australia ee Qaabka Guud habka shaqo ee Sanadaha Barashada Hore ee qaranka oo loogu talagalay barayaasha ilmanimada hore. Ujeedada dukumintyigaan waa inay fidiso oo ay kobciso barashada ilmaha laga bilaabo dhalashada ilaa shan sanadood iyo u gudbida dugsiga.

Golaha Xukuumadaha Australia waxay samayeen habkaan shaqo si ay u caawimaan barayaasha una siiyaan carruurta yaryar fursadaha kor loogu qaado awoodooda laguna hormariyo asaaska si ay ugu guulaystaan waxbarashada mustaqbilka. Sidaan, Qaabka Guud ee Barashada Sanadaha Hore (Qaabka Guud) wuxuu door ka qaadan doonaa xaqiijinta aragtida Golaha Xukuumada Australia in:

“Dhamaan carruurtu ay hellaan bilawga ugu fiican noloshooda si ay ugu abuuraan mustaqbil wanaagsan naftooda iyo qaranka”. [1]

Qaabjka Guud wuxuu xiganayaa caddayn caalami ah oo biya-kama dhibcaana in ilmanimada tahay xilli xasaasi ah xagga koritaanka iyo barashada ilmaha. Waxaa la sameeyey iyada oo la tixgelinayo aragtida qaybta ilmanimada hore, aqoonyahanada ilmanimada hore iyo Xukuumadaha Dawlad Goboleedyada iyo territoriga ee Australia.

Qaabka Guud wuxuu sameeyaa asaaska si loo xaqiijiyo in dhamaan carruurtu ilmanimadooda hore iyo hanaanka daryeelkooda hellaan waxbarasho iyo barid leh tayo. Waxay culays mucayina saartaa barasho ku salaysan cayaar waxayna aqoonsanaysaa muhiimada wada xiriirka iyo luqada (ay ku jiraan farbarashada iyo tirabarashada) iyo koritaanka shucuureed iyo bulsho. Qaabka Guud waxaa loo qoondeeyey in uu isticmaalo barayaasha carruurnimada hore oo la shaqaynaya qoysaska, barayaasha ugu horreeya iyo barayaasha ugu saamayn badan.

Barayaasha ilmanimadad hore waxa haga habka-shaqo oo xoojin doona waxqabadkooda maalmeed ee mabaadiida ay dhigtay Jimciyada Quruumaha ka Dhexaysaa xagga xuquuqda ilmaha (Shirweyne). Shirweynuhu wuxuu sheegaa in dhamaan carruurtu xaq u leeyihiin waxbarashada taas oo asaas u dhigta noloshooda, kor u qaada awoodooda, ixtiraamta qoyskooda, dhaqanka iyo aqoonsiga kale iyo luqada. Shirweynuhu wuxuu kaloo aqoonsaday xuquuqda carruurta inay door ka qaataan isla markaana ahaadaan ka qaybgeli firfircoon dhamaan xaalladaha saameeya noloshooda.

Dukumintigani waxaa laga yaabaa inuu xoojiyo, siyaadiyo ama bedelo habka guud ee Dawlad Goboleedyada iyo Territoriga. Xiriirka saxda ah waxaa go’aamin doona sharciga meesha ka jira.

Guud ahaan, Habka guud wuxuu kaalmeeyaa Hadafka 2aad ee Baaqa Melbourne oo Bartilmaamdeedka Waxbarashada Australiyaanka[2] Dhalinta yar, in:

*Dhamaan dadka dhalinta yari noqdaan:*

- *Bartayaal guulaysta*
- *Isku kalsoon ahna shakhsiyaad hal abuur leh*
- *Muwaadiniin Firfircoon oo warqaba.*

**Barayaasha:**
Macalimiinta ilmanimada hore oo tooska ula shaqeeya carruurta dhalinta yar ilmanimadooda hore.

1 *Investing in the Early Years - a National Early Childhood Development Strategy*, Council of Australian Governments

2 Diseembar 5teeda 2008, Dawlad Goboleedka, Territoriga iyo Wasiirada Waxbarashada ee Dawlada Dhexe, Barbaarinta iyo Arrimaha Dhalinyarada, ayaa soo saaray Baaqa Melbourne ee Hadafyada Waxbarashada Dhalinta Australiyaanka ah.

**Carruur:**
Waxa laga hadlaya kuwa dhashay, kurayga iyo saddex ilaa shan sano ilma jira haddii aan si kale loo sheegin.

Baaqa Melbourne waxaa kaloo ka go'an natiijooyin la wanaajiyey ee Aborijiniska iyo Torres Strait Islander dhalinta yar iyo xoojinta barashada ilmanimada hore.

Golaha Xukuumada Australia waxaa ka go'an inay buuxiyaan guusha faraqa u dhexeeya waxbarashada Australiyaanka iyo kuwa asaliga ah sanad gudihiis.[3] Waxbarashada ilmanimada hore waxay leedahay door muhiima si natiijadaan loo hello.

Iyada oo la aqoonsanayo arrintaan, dukuminti mucayina oo siiya barayaasha tuse siyaada ah xagga xaqiijinta amaanka dhaqan ee carruurta Aborijiniska iyo Torres Strait Islander iyo qoysaskooda ayaa la hormarin doona waxayna heli doonaan barayaal.

Muddo yar macluumaad siyaada ah ayaa laga yaabaa in la sameeyo si loo kaalmeeyo dalabka Qaabkaan Guud

**Barasha ku salaysan cayaar:**
Xaallada barashada oo ay carruurtu oo ay macna ugu sameeyaan adduunkooda ijtimaaciga ah markay si firfircoon ula dhaqmayaan dadka, sheeyada iyo matalida.

3 The Council of Australian Governments - Communique - 3 July 2008. *Indigenous Reform - Closing the Gap.*

# ARAGTIDA FOG EE BARASHADA CARRUURTA

*Dhamaan carruurtu waxay la kulmaan barasho leh hawlgelin waxayna u dhistaan guul ebed ah.*

Asalka Qaabka guud waa aragtida nolosha ilmaha oo ay ka muuqato lahaansho, ahaansho iyo noqosho. Laga bilaabo dhalashada carruurtu waxay ku xiran tahay qoyska, bulshada, dhaqanka iyo goobta. Koritaankooda hore iyo barashadu waxay ka dhacdaa cilaqaadkaan, khaasatan qoyska dhexdiisa, kuwaas oo ah barayaasha ugu mihiimsan uguna horreeya carruurta. Marka carruurtu ka qaybgalaan nolol maalmeedka, waxay yeeshaan danayn waxayna dhistaan aqoonsigooda iyo fahamkooda adduunka.

## LAHAANSHAHA

Fahmida *lahaanshaha* – garashada halkaad iyo ciddaad leedahay – waa u muhiim jiritaanka aadamiga. Carruurta waxay leedahay ugu horrayn qoys, koox dhaqameed, deris iyo bulsho ballaaran. *Lahaanshadu* waxay aqoonsataa carruurta ku tiirsanaantooda kuwa kale asaaska xiriirada qeexaya aqoonsiga. Ilmanimada hore, iyo inta qofku nool yahay oo dhan, cilaaqaadku muhiim ayuu u yahay dareenka *lahaanshaha.* Lahaanshuhu xudun ayuu u yahay *ahaanshaha iyo noqoshada* waxayna qaabaysaa cidda carruurtu yihiin iyo cidda ay noqdeen.

"Waxaad leedahay gurigaaga iyo qoyskaaga" **– Dong**

## AHAANSHO

Ilmanimadu waa waqti la soo maro, si loo raadiyo macnana loogu sameeyo adduunka.

"Haddii aad doonayso inaad ahaato gabareeymaanyo waad qiyaasi kartaa" **– Jazmine**

*Ahaanshuhu* wuxuu aqoonsadaa muhiimada halkan iyo hadda nolosha carruurta. Waxay ku saabsan tahay wixii khuseeya wixii hadda jira iyo inay ogaadaan naftooda, dhisida cilaqaadka kuwa kale, wax ka qabashada raaxada nolosha iyo caqabadaheeda, iyo ka soo bixida loolanka nolol maalmeedka. Ilmanimada hore maaha keliya diyaargarowga mustaqbilka balse waqtiga xaadirka ah.

## NOQOSHADA

Aqoonsiga carruurta, aqoonta, fahmida, kartida, xirfadaha iyo isbedelka cilaaqaadka inta ilmanimada lagu jiro. Waxaa saameeya xaallada badan iyo marxalada badan. Noqoshadu waxay ka tarjuntaa habkaan leh degdega iyo isbedelka wax ku oolka ah oo ku dhaca sanadaha hore ee koritaanka ilmaha. Wuxuu xoojiyaa barashada iyo si buuxda oo fiorfircoon uga qaybgelida bulshada.

"Markaad abuurto dhir waxaad noqotaa beer yaqaan" **– Olivia**

**Natiijooyinka barashada:**
xirfad, aqoon ama dabeecad ay barayaashu si firfircoon u samayn karaan ilmanimada hore, xagga la shaqaynta carruurta iyo qoysaska.

**Maaraynta Ilmanimada hore:**
daryeel maalmeed dheer, daryeelka marmarka ah, daryeelka maalmeed ee qoyska, adeegyada ilmaha Aborijinaalka ah ee qaababka kala duwan, dugsiga ka hor iyo kindergartenka, kooxaha wada cayaara, bandhig, maaraynta faragelinta hore iyo adeegyada la midka ah.

Qaabka Guud oo wax qabadku wuxuu gudbiyaa filitaanka ugu sarreeya dhamaan barashada carruuraha laga bilaabo dhalashada ilaa shan jirka iyo ilaa ay ka gaarayaan dugsiga. Waxay wax ka qabtaan filitaankaan iyaga oo raacaya shan natiijooyin barasho.

- Carruurtu waxay leeyihiin dareen weyn oo aqoonsi
- Carruurtu waxay ku xiran yihiin qaybna ka qaataan adduunkooda
- Carruurtu waxay leeyihiin dareen weyn oo samaqabkooda
- Carruurtu waa isku kalsoon yihiin waana bartayaal ka qayqaadanaya
- Carruurtu waa kuwa si wanaagsan dadka ula xiriira.

Habka guud ee wax qabadku wuxuu siiya hogaamin weyn barayaasha ilmanimada hore kaas sahlaya barashada carruurta.

Wuxuu hagaa go'aan ka samaynta manhajkooda wuxuuna caawimaa xagga qorshaynta, hirgelinta iyo qiimaynta tayada maaraynta ilmanimada hore. Sidoo kale wuxuu hubiyaa hirgelinta manhajyo mucayina oo bulsha walba oo la xiriira maaraynta ilmanimada hore.

Qaabka Guud waxaa loo qorsheeyey inuu dhiirigeliyo sheekaysiga, wanaajiyo wada xiriirka uuna siiyo luqad guud oo ku saabsan barashada iyaga dhexdooda ah, qoysaskooda, bulshada guud, barayaasha ilmanida hore iyo aqoonyahanada kaleeto.



## ASAASKA HABKA GUUD

Qaabka Guud wuxuu dhigaa barashada carruurta bartanka wuxuuna ka kooban yahay saddex waxyaallood oo wada xiriira: Mabaadiida, Natiijooyinka Barashada iyo Waxqabadka iyo Barashada (arag sawirka 1aad). Dhamaan saddexda qaab waxay asal u yihiin barbaarinta ilmanimada hore iyo go'aan ka samaynta jadwalka.

Manhajku wuxuu ka kooban yahay xarakaadyada oo dhan, khibradaha, sida wax u socdaan, munaasabadaha, la qorsheeyey ama aan la qorshayn, kuwaas oo ka dhaca bay'ad loo qorsheeyey inay caawinto barashada ilmaha iyo horumarinta.

Xoog saarida Qaabka Guud ee waxqabadku waa sida loo qorsheeyey ama sida looga jeedo manhajka.

Carruurtu waxay soo dhoweeyaan waaya-aragnima kala duwan. Waxa ku jira ama aan ku jirin manhajka wuxuu saameeyaa sida carruurtu wax u barato, u korto una gartaan adduunka.

Qaabka Guud ee waxqabadku wuxuu kaalmeeyaa hab lagu samaynayo go'aanka manhajka. Tani waxay ku lug leedahay barayaasha kala soo baxaya aqoontooda mihnadeed, taas oo ay ku jirto aqoontooda hoose ee ilma walba.

La shaqaynta qoysaska, barayaashu waxay isticmaalaan natiijooyinka Barashada si ay u hagaan qorshayntooda barashada. Si carruurta loogu hawlgeliyo si firfircoon xagga barashada, barayaashu waxay aqoonsadaan ilmaha awoodiisa iyo wuxuu danaynayo, si loogu doorto istaraatiijiya waxbarasho oo ku haboon loona qoondeeyo naqshada bay'ada barashada.

Barayaashu waxay si degan u qiimaynayaan barashada si loogu wargeliyo qorshayn intaas ka badan.

**Manhajka:**
Barnaamijka manhajka ilmanimada hore wuxuu yahay 'dhamaan isdhexgalada, khibradaha, xarakaadka, waxyaallaha joogtada u dhaca iyo munaasabadaha, la qorsheeyey aan la qorshayn, kaas oo ka dhaca bay'ad loo qoondeeyey inay kobciso barashada ilmaha iyo koritaanka'. [Waxaa laga soo qaatay Te Whariki]

**Barbaarinta:**
waxqabadka mihnadlayaasha barayaasha ilmanimada hore, khaasatan xaalladaha ku lugta leh dhisida iyo kobcinta cilaaqaadka, go'aan ka gaarida manhanjka, barida iyo barashada.

## BARASHADA CARRUURTA

Kala-jaadjaadnimada nolosha qoyska macneheedu waxa weeye in carruurtu u dareemaan *lahaansho, ahaansho iyo noqosho* siyaalla kala duwan. Waxay keenaan khibradahooda kala duwan, aragtidooda, filitaankooda, aqoontooda iyo xirfadaha waxbarashadooda.

Barashada carruurtu waa wax firfircoon, isku-dhafan oo guud. Xaalladaha luqada iyo fahamka, hal-abuurka, ruuxiga, shakhsiyeed, dareen, bulsho iyo jireed ee barashada ayaa dhamaantood isku-xiran oo isla xiriira.

Cayaartu waa xaallad la xiriirta barashada taas oo:

- Ogolaata muujinta shakhsiyada iyo kelinimada
- Xoojisa dabeecada sida isku-deyida fahamka shey iyo hal abuurka
- Awood u siinta carruurta inay isku xiraan waxa u dhexeeya khibrad hore iyo barasha cusub
- Ka caawinta carruurta inay sameeyaan cilaaqaad iyo aragtiyo
- Kobcisa dareen sama-qab.


Carruurtu waxay dhisaan fahamkooda waxayna ka qaybqaataan barashada kuwa kale. Waxay aqoonsadaan ficilkooda, awooda lagu bilaabo laguna hogaamiyo barashada, iyo xuquuqdooda si looga qaybgalo go'aanada waxyeella iyaga, kuwaas oo ay ku jirto barashadoodu.

U arkida carruurta ka qaybgelayaal firfircoon ahaan iyo go'aan sameeyayaal u furan suurtagalnimada barayaasha si ay uga gudbaan wixii la filayey ee ku saabsanaa waxa carruurtu samayn karaan ama baran karaan. Taasi waxay u baahan tahay in barayaashu ixtiraamaan ulana shaqeeyaan ilma walba tayadiisa gaarka ah iyo awoodihiisa.

Barayaasha waxqabadkooda iyo cilaaqaadka ay la yeeshaan carruurta iyo qoysaska ayaa leh saamayn weyn oo doorka carruurta iyo guusha barashada. Carruurtu waxay ku bulaalaan marka qoysaska iyo barayaashu wadajir u shaqeeyaan si ay u kaalmeeyaan carruurta de' yarta ah barashadooda.

Barashada hore ee carruurta waxay saamaysaa fursadaha noloshooda. Samaqabka iyo dareenka xoogan ee isku-xirnaanta, khayr filashada iyo ka qaybqaadashadu wixii u suurtageliya ilmaha inay yeeshaan barasho wax ku oolla oo barashada.

Qaybta Natiijooyinka Barashada ee Qaabka guud wuxuu siiyaa tusaalayaal caddayna ee barahsada carruurta iyo doorka barayaasha.




Muqaalka 1aad: Qaabka Guud ee Qaybaha Barashada Sanadaha Hore

**Lug ku yeelashada:**
waa xaallad xoogan, u baahan waxqabad aan kala har lahayn, kaas oo ay saamaysay feejignaan joogta ah iyo da'daal asal ah. Carruurta aadka ugu lug lihi (iyo kuwa waaweynba) waxay ku shaqeeyaan xuduudooda iyo kartidooda, ku hagaysaa habab isbedelay oo wax ka qabasho iyo faham ku hagaya heer aad u sarreeya oo barasho. (waxa laga soo qaatay Laevers 1994).

**Dabeeacda:**
dabeecada u dulqaadashada maskaxeed iyo ficil, iyo u badnaanta inaad wax ka qabato hababka dabeecadeed ee xaalladaha, tusaale ahaan, qaadashada male rajo leh, inaad doonayso inaad ilaaliso, u waajihida khibrada cusub si kalsooni ah. (Carr, 2011)

# BARASHADA ILMANIMADA HORE

Erayga barasho wuxuu ka hadlaa habka wax qabad oo dabeecada guud ee barayaasha ilmanimada hore (khaasatan xaalladaha lugta la leh dhisida kobcinta cilaaqaadka), go'aan samaynta manhajka, barista iyo barashada. Marka barayaashu la abaabulaan cilaaqaad daryeel ixtiraam waalidka iyo qoysaska, waxay awoodaan inay ula shaqeeyaan wadajir si ay u dhisaan manhaj iyo khibrad waxbarasho oo xiriir la leh carruurta si waafaqsan xaallada goobtooda. Waaya-aragnimadaasi si koraysa ayey u fidisaa aqoonta carruurta iyo fahamkooda adduunka.

Aragtida barayaasha mihnadlayaasha ahi waxay xudun u yihiin doorka firfircoon xagga sahlida barashada carruurtooda. Samaynta aragtiyo mihnadeed, waxay isku xiraan:

- Xirfadaha iyo aqoonta mihnadeed
- Aqoonta carruurta, qoysaska iyo bulshada
- Ogaanshaha sida waxay aaminsan yihiin iyo qayimka saamaynaya barashada carruurta
- Hanaanka nololeed ee shakhsiga iyo waaya-aragnimadii hore.

Waxay kaloo soo qaataan hal-abuurkooda, cabirkooda iyo mala-awaalkooda si ay uga caawinto iyaga wanaajinta iyo hagaajinta falkooda si ay ugu haboonaato waqtiga, meesha iyo xaallada barasho.


Aragtiyo kala duwan oo ku saabsan ilmanimada hore ee carruurta ayaa sheega qaababka waxbarashada iyo horumarkooda. Barayaasha ilmanimada hore waxay ka soo qaataan aragtiyo kala duwan xagga shaqadooda kuwaas oo ay ku jiri karaan:

- Aragtiyo horumarineed oo diirada saara qeexida iyo fahamka habka wax u socdaan ee bedelida barashada carruurta iyo horumarinta  waqtiga la joogo
- Aragtida dhaqan-bulshadeed oo xooga saaraya doorka dhexe ee qoysaska iyo kooxa dhaqameedku ka cayaaraan barashada carruurta iyo muhiimada cilaaqaad ixtiraam leh waxayna ka bixiyaan muuqaal hoose xaallada dhaqan iyo bulsho ee barashada iyo horumarinta.
- Aragtida dadka aqoonta u leh dabeecada bulshada oo diirada saaraya doorka qaabaynta dabeecada carruurta
- Aragtiyaha aadka ugu soo horjeeda oo soo dhoweeya barayaasha ilmanimada hore si ay ula loolamaan waxa laga qabo manhajka, una qadariyaan go'aanadooda ayaa laga yaabaa inay wax u-yeesho si ka duwan
- Aragtiyaha qaabay-yayaashii hore kuwaas oo ka bixiya sawir hoose arrimaha awooda, sinaanta iyo cadaalada bulshada ee asaaska ilmanimada hore.

Qaadashada aragtiya kala duwan iyo fikrado loolan la samayn kara habkii asalaga ahaa oo carruurta loo arkayey, barida iyo barashada iyo dhiirigelinta barayaasha, shakhsi ahaan iyo asxaabta, si:

- Loo baaro sababta ay ugu dhaqmaan ugana doodaan sidaan
- Looga hadlo looga doodo aragtida lagu aqoonsado awooda iyo xadadka
- Loo aqoonsado sida aragtiyaha iyo waxa la aamisan yahay ay macne ugu sameeyaan shaqadooda laakiinse u xadadaan ficilkooda iyo fekerkooda
- Loo qadariyo waxa ka soo baxa ficilkooda si waaya-aragnimada carruurta
- Loo helo habab cusub oo loogu shaqaynayo si cadaalad iyo xaq ah.

# MABAADIIDA




Kuwa soo socdaa waa shanta mabda' oo ka jawaabaya aragtiyaha cusub iyo caddaynta cilmi baarista khusaysa barashada ilmaha iyo waxbarashada ilmanimada hore. Mabdayadani waxay hoosta ka xariiqayaan falka diirada saaraya caawinta dhamaan carruurta si loo sameeyo hor-u-socod wixii la xiriira Natiijooyinka Barashada.

## 1. Cilaaqaad labada dhinac ah oo ku dhisan amni iyo ixtiraam

Barayaasha ogol firadaha carruurta iyo dareenkooda, waxay kaalmeeyaan koritaan leh dareen xoogan oo samaqabeed. Waxay si wax ku oolla ula macaamilaan carruurta yaryar xagga barashadooda.

Cilmi baaris ayaa muujisay in carruurtu ay yihiin kuwa ugu nugul khatarta kuwa ka bixin kara tartanka.

Carruurta yaryar ku xirnaantooda ugu horraysa qoysaskooda iyo cilaaqaadka kale ee la imaan karaa wuxuu siiyaa saldhig amaana oo sahamin iyo barasho.

Shabakad aad u ballaaran oo cilaaqaad amaana, carruurtu waxay ku yeelanayaan oo dareemayaan ixtiraamid iyo qiimayn. Waxay noqdaan kuwa si isa taraysa u aqoonsanaya una ixtiraamaya dareenka kuwa kale si ay si wax ku oolla ula macaamilaan kuwa kale.

Barayaasha siiya ahmiyad gaara kobcinta cilaaqaadka siinaya carruurta kaalmo shucuureed oo caawimi kara carruurtu inay yeeshaan xirfadaha iyo fahamka ay u baahan yihiin si ay ula macaamilaan si wax ku oolla kuwa kaleeto. Waxay kaloo caawin karaan inay bartaan masuuliyaadkooda kuwa kale, si loo qadariyo ku xirnaantooda iyo isku tiirsanaantooda bartayaal ahaan, una qiimayn lahaayeen iskaashiga iyo wada shaqaynta kooxeed.

## 2. Hawlwadaag

Waxay u badan tahay in la gaaro Natiijooyinka barashada markay barayaasha ilmanimada hore si hawlwadaag ah ula shaqeeyaan qoyska. Barayaashu waxay aqoonsadaan in qoysaska waxa ugu horreya uguna muhiimsan yihiin macalimiinta. Waxay abuuraan bay'ad soo dhoweyn leh halkaas oo dhamaan carruurta iyo qoysaska lagu ixtiraamo si firfircoona loogu dhiirigeliyo inay wax la qabtaan barayaasha wixii ku saabsan go'aanada manhajka si loo xaqiijiyo in waaya-aragnimada barashadu macna leedahay.

Hawlwadaagnimadu waxay ku salaysan tahay asalka fahamka qof walbaa filanayo iyo hab dhaqankiisa, iyo ku dhisida awooda aqoonta qof walba oo ka mid ah.

Hawlwadaagnimada dhabta ah, qoysaska iyo barayaasha ilmanimada hore:

- Waxay  qiimeeyaan kuwa kale aqoontooda iyo ilma walba
- Waxay qiimeeyaan qola walbaa waxay soo-kordhisay iyo doorarka ilmaha noloshiisa
- Aaminida qolada kale
- Waxay u wada xiriiraan si xor ah oo ixtiraam leh
- Waxay wadagaan fahamka aragtida ilmaha
- Waxay sameeyaan go'aan la wadaagayo.

Kuwa hawsha wadaagayaa waxay lug ku yeeshaan barayaasha, qoysaska waxay kaalmeeyaan mihnadlayaasha wadajirka u wada shaqaynaya si ay u sahamiyaan muhiimada barashada hawlaha nolol maalmeedka, wixii joogto loo qabanayo iyo cayaarta si loo siiyo carruurta qabta baahi gaara fursadaha maalmeed loona barto ka qaybgal firforcoon ee khibradahaas guriga iyo ilmanimada hore ama xaalladaha takhasuska.

## 3. Filitaan sarre iyo sinaan

Barayaasha ilmanimada hore oo ay ka go'an tahay sinaantu waxay aaminsan yihiin in dhamaan carruurta awoodooda ay ku guulaystaan, iayada oo aan ku xirnayn xaallada kala jaadjaadka ah iyo kartidooda. Carruurtu si fiican ayay horumar sameeyaan markay, waalidkood iyo barayaashu ay rajo fiican ka qabaan guulaha waxbarashadooda.

Barayaasha ilmanimada hore waxay aqoonsadaan waxna ka qabtaan caqabadaha carruurtu inay

MABAADIIDA

gaaraan guul waxbarasho. Si ay wax uga qabtaan waxay wax ka qabtaan falalka sababa sinaan la'aanta waxayna sameeyaan go'aan manhaj oo saacida ka mid ahaansho iyo ka qaybgalka carruurta dhamaanteed. Iyaga oo horumarinaya aqoontooda mihnadeed iyo xirfadeed, kulana shaqaynaya hawlwadaag carruurta, qoysaska, bulshada, adeegyada kale iyo hay'adaha, waxay joogto ugu da'daalaan inay hellaan habab wax ku oolla oo loo sinaan karo si loo xaqiijyo in dhamaan carruurtu haystaan fursadaha ay ku gaaraan natiijooyinka barashada.

## 4. Ixtiraamka kala jaadjaadnimada

Waxaa jira siyaalla badan oo loo noolaado, ahaado iyo ogaansho. Carruurtu waxay dhashaan iyaga oo leh dhaqan, oo keliya aanu saamayn ku yeellan falka dhaqanka, hidaha iyo aqoonta asaliga ah, iyo weliba waaya-aragnimada, qiyamka iyo aaminsanaanta qoysaska shakhsiyeed iyo bulshada. Ixtiraamida macnaha kala jaadnimada ku jira manhajka qiimaynaya ficilka, qiyamka iyo waxay aaminsan yihiin qoysasku. Barayaashu waxay xurmeeyaan taariikhda, dhaqamada, luqadaha, dhaqanka, ficilada korinta ilmaha, doorashada hanaanka nolosha qoyska. Waxay qiimeeyaan awoodaha kala duwan ee carruurta iyo ixtiraamida kala duwanaanshaha nolosha guriga ee qoysaska.

Barayaashu waxay aqoonsadaan in kala duwanaanshaha ay qayb ka qaadato baraaraha bulshadeena waxayna siisaa asaas caddayn wax ku oolla oo ku saaban sida lagu ogaanayo. Australia waxaa kaloo ka mid ah kor u qaadida faham guud ee hababka ogaanshaha iyo ahaanshaha Aborijinaalka iyo Torres Strait Islander.

Marka barayaasha ilmanimada hore ixtiraamaan kala jaadnimada qoysaska iyo bulshooyinka, iyo hadafka carruurtooda, inay awoodaan kobcinta da'daalka carruuta si ay u bartaan una xoojiyaan dareenkooda bartayaal ka bixi kara ahaan. Waxay sameeyaan go'aanada manhajka ilaaliya dhamaan xuquuqda carruurta inay haystaan dhaqankooda, aqoonsigooda, awoodooda ayna xoojiyaan qayimka la aqoonsan yahay, ayna wax ka qabtaan nolosha qoysaska iyo carruurta ee ballaaran.

Barayaashu waxay si aad ah uga fekerayaan wixii ku saabsan fursadaha caqabadaha ka soo bixi kara kala jaadnimada si loo qaado talaabo wax lagaga qabanayo xaq darada. Waxay siiyaan fursadaha lagu barto wixii la iskaga mid yahay iyo wixii ku saabsan isku tiirsanaanta iyo sida aan u baran karo in aan wada noolaano.

## 5. Barasha joogto ah iyo waxqabad ka tarjumaya

Barayaashu joogto ayay u raadiyaan sidii ay ku dhisi lahaayeen aqoontooda mihnadeed ayna ku horamarin lahaayeen bulsho waxbaranaysa. Waxay noqdaan kuwa wax la barta carruurta, qoysaska iyo bulshada, waxayna qiimeeyaan sii socodka qanimada aqoonta meeleed ee wadagaan xubnaha bulshadu, kuwaas oo ay ku jiraan dadka waaweyn ee ka soo jeeda Aboriniska iyo Torres Strait Islanders.


Waxqabadka ku aadan dib u eegida waa hab barasho socota ama joogto ah taas oo lug ku leh la xaalida su'aallaha falsafada, anshaxa iyo waxqabadka. Ujeedadeedu waa ururinta macluumaadka iyo helida xogta taas kaalmaynaysa, u sheegaysa oo xoojinaysa samaynta go'aan ku saabsan barashada carruurta. Mihnadlayaal ahaan, barayaasha ilmanida hore waxay eegaan qorshahooda waxayna dib u eegaan waxa laga yaabo inay bedelaan.

Dib-u-eegida muhiimka ahi waxay si dhow u eegtaa dhamaan munaasabadaha nooc walba leh iyo khibradaha aragtiyaha kala duwan. Barayaashu badanaa waxay dhisaan waxqabadkooda dib-u-eegida la xiriira su'aalla baahsan, horumarinta su'aalla mucayina oo meella gaara oo waxweydiineed.

Su'aallaha baahsan oo hagaya dib-u-eegida waxaa ka mid ah:

- Waa maxay fahamkayga ilma walba?
- Aragtidee, falsafadee iyo fahamkee qaabaynaya oo caawimaya shaqadayda?
- Yaa ka faaiidaysanaya markaan sidaan u shaqeeyo? Yaanse faaiido ku qabin?
- Waa maxay su'aallaha aan ka qabo shaqadayda? Maxaan ka loolamayaa? Maxaan doonayaa in aan wax ka ogaado? Maxaa I hortaagan?
- Shaqadayda dhinacee ayaanay  caawimin aragtida iyo tusaha aan badanaa adeegsado si aan macne ugu sameeyo waxaan sameeyo?
- Ma jiraan aragtiyo kale ama aqoon I caawimi karta si aan u fahmo wixii aan la kulmay ama aan arkay? Maxay yihiin? Sidee ayaa aragtiyahaan iyo aqoontaani wax u yeellaan waxqabadkayga?

Is weydiin mihnadeed iyo dhaqan oo firfircoon ayaa la asaasay markii barayaasha ilmanimada hore iyo kuwa ay wada shaqeeyaan ay kulligood lug ku leeyihiin wareega socda oo dib u dersida taas oo lagu eego waxqabadka hadda socda, natiijada dib u dersida iyo fikrada cusub ee la abuuray. Jawiga noocaan ah, arrimaha la xiriira tayada manhajka, sinaanta iyo samaqabka carruurta ayaa la soo qaadi karaa oo laga doodi karaa.




# WAXBADKA



Mabaadiida waxbarashada ilmanimada hore waxay kaalmaysaa waxqabadka. Barayaashu waxay soo qaataan waxqabad waxbarasho oo xoogan si ay kor ugu qaadaan waxbarashada carruurta iyagoo:

- Qaadanaya waajihid guud oo dhamaystiran
- Iyaga oo wax u qabanaya carruurta
- Iyaga oo qorshaynaya oo hirgelinaya wax ku barshada cayaarta
- Waxbarid ula kac ah
- Abuurista bay'ada barashada bulshada taas oo saamayn ku leh barashada carruurta
- Qiimaynta xaallad bulsho iyo dhaqan ee carruurta iyo qoysaskooda
- Siinta sii wadid xagga khibrada iyo awood u siinta carruurta ay yeeshaan gudbid guul leh
- Qiimaynta iyo la socodka barashada carruurta si loogu sheego bixinta iyo kaalmada carruurta xagga gaarista natriijooyinka barashada.

## Waajihid guud

Waajihid dhamaystiran ee barista iyo barashadu waxay aqoonsataa isku xirida maskaxda, jirka iyo ruuxa[4]. Marka barayaasha ilmanimada hore ay qaadato waajihid dhamaystiran waxay ahmiyad siiyaan ilmaha jir ahaan, shakhsiyada, bulshada, iyo samaqabka ruuxiga ah iyo weliba dhinaca fahamka ee barashada. Halka barayaasha laga yaabo inay qorsheeyaan ama qiimeeyaan iyada oo diirada la saarayo natiijo mucayina ama moodalka barashada, waxay u arkaan barashada carruurta mid isku dhafan oo isku xiran. Waxay aqoonsadaan isku-xirka u dhexeeya carruurta, qoysaska iyo bulshada iyo muhiimada cilaaqaadka labada dhinac ah iyo wadaagista barashada. Waxay u arkaan barasahada xaraakaad bulsho iyo qiimaha barasho leh wadashaqayn iyo ka qaybgalka bulshada.

Isku dhafana, leh waajihid dhamaystiran oo barista iyo barashada taas oo weliba diirada saarta isku xirnaanta adduunka dabiiciga ah. Barayaashu waxay kobciyaan awooda caruurta si ay u fahmaan una ixtiraamaan bay'ada dabiiciga ah iyo isku-tiirsanaanta u dhexaysa dadka, dhirta, xayawaanka iyo dhulka.

## Wax ka qabashada baahida carruurta

Barayaashu wax bay kala qabtaan dhamaan carruurta awoodaada iyo waxay xiisaynayaan. Waxay qiimeeyaan oo dhisaan xooga carruurta, xirfadooda iyo aqoonta si loo xaqiijiyo rabitaankooda iyo u heelnaanta barashada. Waxay u soo joogsadaan aqoonta carruurta, dhaqanka iyo hababka ogaanshaha, luqadaha kala duwan oo carruurtu ku hadasho, khaasatan carruurta Aborijiniska iyo Torres Islander-ka iyo istaraatiijiyada ay isticmaalaan carruurta qabta baahi gaara si ay uga gorgortamaan nolol maalmeedkooda.

**Taabagelin:**
Go'aanada barayaasha iyo ficilada dhisa aqoonta jira ee carruurta iyo xirfadaha lagu xoojinayo barashadooda.

4 Siraj-Blatchford, I., & Sylva, K. (2004). Researching pedagogy in English pre-schools. *British Educational Research Journal, 30*(5), 712-730.

Barayaashu waxay kaloo soo dhoweeyaan fikrada carruurta iyo cayaarta, taas oo samaysa asaas muhiima ee go'aan samaynta manhajka. Iyada oo wax laga qabanayo fikrada carruurta iyo danaynta, barayaashu waxay qiimeeyaan, saadaaliyaan kuna fidiyaan barashada carruurta su'aallo aan xirnayn, waxay siiyaan aragti, iyaga oo ka loolamaya fekerkooda iyo hagista barashadooda. Waxay ka faaiidaystaan "waqtiyada la barikaro" ee xiisaha leh si loo kaalmeeyo barashada ilmaha.

Cilaaqaadka barasho oo waxqabanaya ayaa la xoojiyaa iyada barayaasha iyo carruurtu ay wadajir u baranayaan una wadaagayaan go'aanada, ixtiraamka iyo aaminaada. Wax ka qabashadu waxay u suurtagelisaa barayaasha inay si ixtiraam leh u galaan cayaarta carruurta iyo mashruucyada socda, waxay dhiirigelisaa fekerkooda waxay xoojisaa barashadooda.

## Wax ku barashada cayaarta

Cayaartu waxay siisaa carruurta fursado ay wax ku bartaan markay wax cusub arkaan ama hellaan, abuuraan, farsameeyaan ama maleeyaan. Marka carruurtu la cayaarto carruur kale waxay abuuraan kooxo bulsho, fikrada la tijaabiyey, taxadi ka samaynta fekerka kuwa kale iyo dhisida faham cusub. Cayaartu waxay siisaa bay'ad kaalmayneed halka carruurtu weydiin karaan su'aallo, xaliyaan dhibaatooyin lana yimaadaan fekerado muhiima. Cayaartu waxay ballaarin kartaa carruurta fekerkooda waxayna xoojisaa rabitaankooda inay wax ogaadaan oo wax bartaan.

Hababkaan cayaartu waxay kor u qaadi kartaa dabeecada wanaagsan oo ku saabsan barashada[5]. Ka qaybgalka cayaarta ee carruurta waxay muujisaa in cayaartu u suurtagelisa siday ugu raaxaysan lahaayeen ahaanshaha.

**Barid ku-tala-gal ah:**
Waxay ku lug leedahay in go'aankooda iyo ficilkooda yahay ula kac ujeedo leh. Barida ku talagalka ahi waxay cagsigeeda tahay ka soo horjeedka barista korka qabashada ama sii wadida dhaqanka sababtoo ah sidaas ayaa 'had iyo jeer' loo qaban jiray.

Barayaasha ilmanimada hore waxay qaataan doorar xagga la cayaarida carruurta waxayna isticmaalaan istaraatiijiya kala duwaan si ay u caawimaan barashada. Waxay sameeyaan sheekooyin lala wadaagayo carruurta si loo balaariyo fekeridooda. Waxay abuuran jawi dhiirigeliya in carruurtu sahamiso, xaliso dhibaatooyinka, abuurto oo dhisto. Barayaashu waxay la macaamilaan carruurta si ay u dhisaan isku-xirnaan. Waxay isticmaalaan waxyaalla soo noqnoqonaya iyo cayaar si ay tan u sameeyaan. Waxay kaloo aqoonsadaan dhacdooyin iska dabadhacaya oo la bari karo markay dhacayaan, waxayna u isticmaalaan in lagu dhiso barashada carruurta. Barayaasha ilmanimada hore waxay la shaqeeyaan carruurta yaryar si kor loogu qaado waxayna tusaale ka dhigtaan habab wax ku oolla si loogu gudbiyo kuwa kale. Waxay si firfircoon u kaalmeeyan ka qaygelinta dhamaan carruurta waxayna siiyaan hab wax ku oolla si loo dhiso bulsho waxbarasho oo hawsha ka qaybelaysa si xaq ah oo leh daryeel.

## Barid ula kaca ah

Barida loogu talagalay waa ula kac, ujeedo leh lagana fekeray.

Barayaasha ku mashquulsan barida ula kaca ah waxay aqoonsadaan in barashadu ka dhacdo xaallad gaara oo mucayina iyo is-dhexgalka iyo in sheekooyinku muhiim u yihiin waxbarashada. Waxay si firfircoon kor ugu qaadaan waxbarashada ilmaha iyaga oo ugu gudbinaya waaya-aragnimo loolan leh oo ku haboon iyo isdhexgal kobciya xirfad feker oo heer sarre ah. Waxay isticmaalaan istaraatiijiyooyin sida nadaam u samaynta iyo muujinta, su'aalla furan, mala awaal, sharxida, samaynta fikrada la wadaagayo iyo xalinta dhibaatada si loo ballaariyo fekerka carruurta iyo barashada. Barayaashu waxay u socdaan si furfurmi karta oo doorar kala duwan waxayna soo qaataan istaraatiijiya kala duwan marka xaallada jirtaa isbedeshoba. Waxay qorsheeyaan fursadaha barashada lagu talagalay iyo dhisid-aqooneed. Waxay diiwaangeliyaan lana socdaan waxbrashada carruurta.

## Bay'ada waxbarashada

Bay'adaha waxbarashadu waa gooba soo dhowaynaya markay ka tarjumayaan oo xoojiya nolosha iyo aqoonsiga carruurta iyo qoysaska ka

5 Siraj-Blatchford, I., & Sylva, K. (2004). Researching pedagogy in English pre-schools. *British Educational Research Journal, 30*(5), 712-730.

WAXQABADKA

qaybgelaya qorshe u samaynta iyo wax ka qabashada waxay danaynayaan iyo baahidooda. Bay'adaha kaalmeeya barashada waa goobah xayi ah oo furfurmi kara kuwaas oo wax ka qabanaya danaha iyo awoodaha ilma walba. Waxay bixiyaan barasho heerar kala duwan ah iyo hanaan waxbarasho waxayna martiqaadaan carruurta iyo qoysaska si ay ugu biiriyaan fekrado, danoh iyo su'aallo.

Goobaha waxbarasho ee dibada waxay u taagan yihiin bay'adaha barashada ee Australia. Waxay bixiyaan waxyaalla badan oo kala duwan oo aan gudaha laga helli karin. Goobaha cayaaraha ee bay'ada dabiiciga ah waxaa ka mid ah dhirta, cagaarka, waxyaallaha laga hello jardiinada, ciida, dhagaxyada, dhooqada , biyaha iyo walxa kale oo dabiici ah. Goobahaasi waxay ogolaadaan isdhexgal iska furan, isku mar wada dhacaya, qaadashada khatarta, sahaminta, ikhtiraacida iyo ku xirnaanta dabeecada. Waxay kobciyaan qadarinta bay'ada dabiici ah, waxay koriyaan la socodka bay'ada waxayna bixiyaan gole waxbarasho oo bay'ada.

Bay'adaha dibada iyo guduhuba waxay kaalmeeyaan dhamaan siyaallaha carruurtu wax u barato waxayna martiqaadaan sheekaysiga u dhexaya carruurta, barayaasha ilmanimada hore, qoysaska iyo bulsha weynta. Waxay horumariyaan fursadaha fikerka la wadaagayo oo socda iyo waxbarasho iskaashi leh. Qalabka waxay xoojiya barashada markay ka tarjumayaan wixii dabiici ah lana yaqaan oo weliba soo bandhigaya wax cusub si loo furo xiisad aad u qalafsan oo leh fekerid dahsoon oo sii siyaadaysa. Tusaale ahaan, teknoolojiga dhijitaalka ah wuxuu u suurtagelin karaa carruurta inay hellaan ku xirnaan caalami ah iyo khayraad, waxayna ku dhiirigeliyaan masuuliyadeena mustaqbil la sii wadi karo waxayna kor u qaadaan fahamka carruurta wixii ku saabsan masuuliyadooda si loo daryeello bay'ada. Waxay kobcin karaan rajada, la cajabaan aqoonta wixii la xiriira adduunka dabiiciga ah.

Barayaashu waxay dhiirigeliyaan carruurta iyo qoysaska si loogu biiriyo fikrado, danoh iyo su'aallaha barashada bay'ada. Waxay kaalmayn karaan hawlgelinta iyaga oo u ogolaanaya is-dhexgal macna samaynaya, iyada oo la siinayo fursada kala duwan shakhsiga iyo waaya-aragnima la wadaagayo, iyada oo loo hellayo fursado carruurtu si ay ku gasho qaybna kaga qaataan bulshadooda maxaliga ah.

## Aqoon u leh dhaqanka

Barayaasha aqoonta u leh dhaqanka waxay u ixtiraamaaan habab dhaqan oo kala duwan oo ogaanshaha, arkida iyo noolaanshaha, waxay u dabaaldegaan faaiidada kala duwanaanta waxayna leeyihiin awooda lagu fahmo laguna ixtiraamo kala duwanaanta. Taasi waxay ka muuqataa waxqabadka maalin walba ah marka barayaashu muujiyaan ka go'naansho joogto ah si horay loogu mariyo aqoontooda dhaqanka laba hab oo qoysaska iyo bulshooyinka.

Barayaashu waxay u arkaan dhaqanka iyo arrinta qoyska in ay xudun u tahay dareenka carruurta oo ahaanshaha iyo lahaanshaha, iyo inay ku guulaystaan noloshooda. Barayaashu waxay kaloo raadiyaan inay kor u qaadaan aqoonta dhaqan ee carruurta.

Aqoonta dhaqanku waa wax ka durugsan faraqyada dhaqanka. Waa awooda lagu fahmo, lagula xiriiro, si wax ku oollana lagula dhaqmo dad leh dhaqama kala duwan. Aqoonta dhaqanku waxay ka koobantaa:

- Inaad ogtahay sida qof u arko adduunkiisa
- Horumarinta dabeecad wanaagsan oo ku wajahan dhaqama kala duwan
- Yeelashada aqoonta dhaqama kala duwan iyo aragtiyaha adduunka
- Horumarinta xirfado leh wada-xiriir iyo isdhexgal dhaqamada dhamaantood. Continuity of learning and transitions

## Sii wadida barashada iyo ka gudbida marxalad

Carruurtu waxay u keenaan qoyska iyo bulshada habab ahaansho, lahaansho iyo noqoshada habka ilmanimadooda hore. Iyada oo lagu dhisayo khibradaan barayaashu waxay caawimaan dhamaan carruurta si ay u dareemaan amaan, kalsooni iyo mid ahaansho iyo in la arko sii wadida sida lagu ahaado waxna lagu barto.

U gudbida, oo ay ka midka yihiin xaallada guriga ilaa ilmanimada hore, inta u dhexaysa xaalladaha, xaallada ilmanimada hore iyo dugsiga, waxay bixisaa fursado iyo loolan. Meella kala duwan iyo gooboh ayaa waxay leeyihiin ujeedkooda, filitaankooda sida wax loo samaynayo. Dhisida waaya-aragnimada hadda ah iyo wixii ka horreeyeysi ay u dareemaan amaan, kalsooni iyo ku xirnaanta shakhsiyaad

WAXQABADKA

la yaqaaan, gooboh, munaasabado iyo faham. Barayaasha ilmanimada hore, qoysaska iyo carruurta waxay dhamaan door fiiican ka qaataan ka gudbid marxalada u dhaxaysa goobaha.

Iyada oo lala shaqaynayo qoysaska, barayaasha ilmanimada hore waxay xaqiijiyaan in carruurtu leeyihiin door firfircoon xagga diyaarinta gudbida. Waxay ka caawimaan carruurta inay fahmaan caadooyinka, siday wax u socdaan iyo waxqabadka ay ku socdaan iyo inay u dareemaan si degan habka wax isu bedelayaan.

Barayaasha ilmanimada hore ayaa iyaguna ka caawima carruurta inay waanwaan kala galaan isbedelka xaalladooda ama qoonsigooda, khaasatan bilaabaan dugsi waqtigiisu buuxo. Marka carruurtu samaynayaan marxallad ay heer ka gudbayaan oo ku gudbayaan mid cusub (uu ku jiro dugsigu) barayaasha barnaamijka ilmanimada hore iyo dugsiyada ogol macluumaad isdhaafsiga wixii ku saabsan ilma walba aqoontiisa iyo xirfadaha markaas barashadu waxay sii dhisaysaa barashada hore. Barayaashu waxay ula shaqeeyaan si iskaashi leh ilma walba iyo mihnadlayaasha kale si loo xaqiijiyo gudbid guul leh.

## Qiimaynta barashada

Qiimaynta barashada ilmaha waxay khusaysaa habka ururinta iyo taxliilinta macluumaadka caddayn ahaan wixii ku saabsan waxa carruutyu ogtahay, ay qaban karaan oo fahmi karaan. Wuxuu qayb ka yahay wareeg joogto ah kaas oo ay ku jiraan qorshaynta, dukumintigaraynta iyo qiimaynta barashada.

Waa muhiim sababtoo ah waxay awood u siisaa barayaasha oo hawlwadaag la leh qoysaska, carruurta iyo mihnadlayaasha kale si ay:

- Si wax ku oolla ugu qorsheeyaan carruurta waxbarashada hadda iyo mustaqbilka
- Ay uga wada hadlaan horumarka waxbarashada carruurta
- Go'aan uga gaaraan sida carruurta dhamaantood ay horumar uga samaynayaan xaqiiqsiga natiijooyinka waxbarashada iyo haddii aanay ahayn, waxa hor taagan horumarkooda
- Aqoonsiga carruurta laga yaabo inay qabaan baahi siyaada ah si loo gaaro natiijooyin waxbarasho oo khaasa, waxaase shardi ah in in kaalmaynmta ama caawinta qoysasku inay hellaan caawima takhasus ah
- Inay qiimeeyaan wax ku oolnimada fursadaha waxbarashada, bay'ada iyo khibaradaha la bixiyay iyo waxyaallaha la sameeyey si loo suurtageliyo waxbarashada carruurta.
- Inay ka tajumayso waxbarasho ku haboon xaalladaan iyo carruurtaan.

Barayaashu waxay isticmaalaan istaraatiijiya kala duwan si ay u ururiyaan, u diiwaangeshaan, u qabanqaabiyaan, isugu geeyaan una tarjumaan macluumaadka ay ururiyeen si ay u qiimeeyaan waxbarashada carruurta. Waxay cilmi baaris ku sameeyaan hab ku haboon oo lagu ururiyo macluumaad wanaagsan kaas oo muujiya carruurta barashadooda xaallada, qeexida horumarkooda oo aqoonsata xoogooda, xirfadooda iyo fahamkooda. Hab waxqabad oo dhowaan ah sida lagu qiimaynayo ayaa iyaguna eega istaraatiijyo barashada carruurtu isticmalaan iyo hab ay kaga tarjumayaan kaas oo barashada lala dhisay isdhexgal u dhexeeya baraha iyo ilma walba walba. Marka loo isticmaalay si wax ku oolla, hababkaan qiimayntu waa inay noqdaan habab ka dhigaya sida barashadu u noqo mid u muuqata carruurta iyo qoysaskooda, barayaasha iyo mihnadlayaasha kale.

Shanta natiijo oo barasho oo ku jira qaabkaan waxqabad, sida dib looga hadli doono, waxay siiyaan barayaasha ilmanimada hore tixraaca ugu weyn marka loo eego horumarka ilmaha ee la aqoonsan karo, la qori karo loona sheegi karo qoysaska, mihnadlayaasha kale ee ilmanimada hore iyo barayaasha dugsiyada.  Barayaasha shaqada ku jira ayaa awooda inay tarjumaan sida carruurtu ku horamareen, siday doorka uga qaateen fikradaha qalafsan ee soo siyaadaya ugana qaybgaleen waaya-aragnimo barasho oo sarre oo sii siyaadaysa.

Hababka qiimaynta joogtada ah oo ay ku jiraan dariiqooyin kala jaadjaad ahi waxay qabtaan oo qiimeeyaan dhabooyin kala duwan oo ay carruurtu u qaadaan jahada gaarista natiijooyinkaan. Hababka noocaas ahi diirada uma saaraan si gaar u ah maxsuulka dambe oo waxbarashada ilmaha; waxay siiyaan qadarin le'eg "masaafada uu safray" halkii ilmood waxaana la aqoonsadaa loona dabaaldegaa ma aha keliya talaabada weyn oo horay loo qaaday waxbarashadooda balse xataa talaabooyinka yaryar.

WAXQABADKA

Dhamaan caruurtu waxay u muujiyaan siyaalla kala duwan barashadooda. Sida lagu qiimeeyo inay xiriir la leeyihiin dhaqan iyo luqad ahaanta waxna ka qabanayaan awooda garasho iyo jireed oo ilma walba ayaa aqoonsan doonta ilma walba awoodiisa iyo xoogiisa, wuxuuna u ogolaanaya inuu muujiyo aqoonta mawduuca.

Marka lagu daro carruurta qoysaska iyo mihnadlayaasha kale xagga horumarinta iyo fulinta hababka qiimaynta ku haboon waxay u ogolaadaan faham cusubi inuu soo baxo kaas oo aan suurtagelayn haddii barayaashu ku tiirsadaan oo keliya istaraatiijiyadooda iyo siday wax u arkaan. Samaynta qiimayn hab wax qabad oo ay ka qaybgelayaan carruurta iyo qoysaskoodu waxay muujiyaan ixtiraam iyo kala jaadnimo, waxay caawimaan barayaasha inay macne u sameeyaan waxay la socdaan waxayna taageertaa barashada carruurta iyo dadka waaweyn.


Qiimayntu, marka la fuliyo wadashaqayn lala samaynayo qoyska, waxay caawimi kartaa qoysasku inay kaalmeeyaan barashada carruurta ayna xoojiyaan si ay wax uga qabtaan iyaga oo ku hadlaya magaca caruurtooda inta aan la samayn qorshaha ilmanimada hore. Marka carruurta lagu daro habka qiimaynta waxay samayn karaan faham iyaga naftooda ah bartayaal ahaan iyo fahmida sida ugu fiican oo ay u baran karaan.

Marka barayaashu wax ka oranayaan doorkooda barashada ilmaha iyo qiimaynta waxay tarjumaan aragtidooda iyo fahamkooda aragtida ilmanimada hore, cilmi baaris iyo waxqabad diirada saaraya:

- Waaya-aragnimada iyo bay'adaha ay bixiyaan iyo sida taasi ugu xirto natiijooyinka barashada ee loo dan leeyahay
- Intay ka ogyihiin ayna qiimeeyaan aqoonta gaarka u ah dhaqanka wixii ku saabsan carruurta iyo barashada ka dhexjirta bulshada ay ka shaqaynayaan
- Ilma walba barashadiisa xaalka qoyskooda, ka shidaal qaadashada sida qoysku wax u rabaan, fahamka, waaya-aragnimada iyo filitaanka fursadaha barashada oo ku dhisanta waxa carruurtu horay u ogaayeen iyo waxay keeneen goobta ilmanimada hore
- Caddaynta khibrada barashada hore ay bixisay waa mid ka qaybgelinaysa dhamaan carruurta iyo dhaqanka ku haboon
- Samayn la'aanta mala awaal ku saabsan barashada carruurta  ama u samaynta filitaan hoose carruurta qaarkeed eexasho aan la aqoonsan darteed
- Ku darista waxqabad waxbarasho taas oo ka tarjumaysa aqoonta kala jaadjaadka ah iyo ku biirinta carruurta samaqabkooda iyo waxbarasho guul leh
- Haddii ay jirto khibrad loolan oo ku filan dhamaan carruurta whether there are sufficiently challenging experiences for all children
- Caddayn muujinaysa in carruurtu wax baranayaan
- Siday ku fidin karaan dariiqooyinka kala duwan ee ay qiimeeyeen si looga dhigo qiimaynta mid xoog leh macluumaad fiicana xambaarsan

WAXQABADKA

# NATIIJOOYINKA BARASHADA




Shanta Natiijo ee Barashada waxaa loo qoondeeyey in wax lagaga qabto barashada wajiyada badan oo isku dhafan iyo horumarinta dhamaan carruuraha laga bilaabo markay dhashaan ilaa ay ka gaaraan shan sanadood. Natiijooyinku waa:

- Carruurtu waxay leeyihiin dareen xoogan oo leh aqoonsi
- Carruurtu waxay ku xiran yihiin door fiicana ka qaataan adduunkooda
- Carruurtu waxay leeyihiin dareen xoogan oo nabadqab
- Carruurtu waxay leeyihiin kalsooni waana bartayaal lug ku leh
- Carruurtu waa kuwa ku haboon xagga wada xiriirka

Natiijooyinku waa kuwa ballaaran lana dareemi karo. Waxay aqoonsadaan in carruurtu wax u barato siyaalla kala duwan, wayna ku kala duwan yihiin awoodooda waxbarasho. Muddo ka dib carruurtu waxay wajahaan fikrado baaxad weyn iyo waaya-aragnimo waxbarasho, kuwaas oo loo xawilo karo xaallada kale.

Barashada xagga natiijooyinka waxaa saameeya:

- Ilma walba awoodiisa hadda ah, dabeecada iyo doorbidida la xiriirta barashada
- Waxqabadka barayaasha iyo bay'ada ilmanimada hore
- Hawlgelinta ilma walba qoyskiisa iyo bulshada
- Ku xirnaanta barashada dhamaan natiijooyinka

Barashada carruurtu waa mid joogto ah ilma walbaana wuxuu u sii siqayaa dhinaca natiijooyinka siyaalla wax ku oolla oo siman kalana duwan. Barayaashu waxay qorsheeyaan ilma walba iyo natiijooyinka maskaxda lagu hayo.

Natiijooyinka barashada ee soo socda waxay muujiyaan sida saddexda shey oo kala ah Qaabka Guud: Mabaadiida, Waxqabadka, iyo Natiijooyinku ay wadajir ahaan u hagaan manhajka go'aan samaynta iyo qiimaynta si kor loogu qaado barashada carruurta.

Inta ugu muhiimsan ee barashada natiija walba ayaa la fidiyey si ay u siiso tusaalayaasha caddayn in barayaashu laga yaabo inay la socdaan carruurta markay waxbaranayaan. Tusaalayaasha waxqabadka si kor loogu qaado barashada carruurta ayaa iyadana lagu daray.

Waxaa jira siyaalla badan oo kale oo carruurtu ku muujin karaan barashada natiijooyinka dhexdooda iyo banaankoodaba. Barayaashu way fahmaan, hawlgeliyaan korna u qaadaan waxbaarshada carruurta. Waxay la hadlaan qoysaska iyo bulshada si loo sameeyo go'aana ku salaysan maxaliga, la xiriira ilma walba iyo bulshadooda.

Waxaa jira hab barayaashu wax ku bixin karaan si loo diiwaangeliyo tusaalayaal mucayina oo cadaynaya iyo waxqabad kaas oo dhaqan iyo xaallad ahaanba ku haboon ilma walba iyo goobtooda.

Qodobada lagu sharxay natiijooyin walba waxay ku lug leeyihiin ilmaha da' walba ah. Aqoonta ilma walba, waxqabadkooda iyo awoodooda ayaa hagi doonta barayaasha go'aankooda mihnadeed si loo xaqiijiyo in dhamaan carruurtu ay ka qaybgelaan khibrada kala duwan oo dhamaan natiijooyinka barashada hab xoojiya barashadooda.



## **NATIIJADA 1AAD:** CARRUURTU WAXAY LEEYIHIIN DAREENKA OO AQOONSIGA

*Lahaanshaha, ahaanshaha iyo noqoshada* ayaa ah qaybaha ugu weyn oo aqoonsiga.

Carruurtu waxay bartaan naftooda waxayna dhisaan aqoonsiga qoysaskooda iyo bulshada dhexdeeda. Taas waxaa ku jira cilaaqaadkooda dadka, meelaha iyo waxyaallaha iyo ficilada iyo la falgelida kuwa kale. Aqoonsigu ma xadadna. Waxaa qaabeeyaan khibradaha. Marka carruurtu leedahay waaya-aragnimo wax ku oolla waxay horay u mariyaan faham iyaga ah oo muhiima lana ixtiraamo waxayna dareemaan dareenka lahaansho. Cilaaqaadku waa asaaska dhisida aqoonsiga – 'maxaan ahay', sidee leeyahay iyo 'waa maxay saamaytoodu?

Qaabka ilmanimada hore carruurtu waxay yeeshaan dareen lahaansho markay dareemaan in la aqbalay, waxay sameeyaan ku xirnaan iyo aaminid kuwa iyaga daryeella. Marka carruurtu yeelanayso dareenkooda aqoonsiga, waxay sahamiyaan waxyaalla kala duwan (jireed, bulsho, shucuureed, niyad ahaaneed, iyo faham), iyaga oo ka hellaya cayaarta iyo cilaaqaadkooda.

Marka carruurtu dareemaan amaan, amni lana kaalmeeyo waxay ku koraan kalsooni ay ku sahamiyaan kuna bartaan.

Aragtida ahaansho waxay xasuusisaa barayaasha inay diirada saaraan carruurta halkan iyo hadda, iyo muhiimada carruurta xaqoodu inuu ahaado ilmoh ayna ku raaxaystaan ilmanimada. Ahaanshuhu wuxuu ku lug leeyahay carruur yeelanaysa ogaanshaha hidahooda dhaqan iyo bulsho, oo sinji iyo macnaha adduunkooda u leeyahay.

Noqoshada waxaa ka mid ah carruur ku dhisaysa aqoonsigooda khibradaha iyo cilaaqaadka ay ku jiraan isbedel iyo u gudbid nolol kale. Carruurtu had iyo jeer waxay baranayaan wixii la xiriira saamaynta qayimka iyo aaminsanaanta. Hay'ada carruurta, iyo weliba hagida, daryeelka iyo barida qoysaska iyo barayaasha waxay qaabeeyaan waaya-aragnimada carruurta ee noqoshada.

## **NATIIJADA 1AAD:** CARRUURTU WAXAY LEEYIHIIN DAREEN XOOGAN

- Carruurtu waxay dareemaan amaan, amni iyo kaalmayn
- Carruurtu waxay yeeshaan xoriyadooda soo koraysa, isku-tiirsanaan, debecsanaan iyo dareen kaalmayn
- Carruurtu waxay yeeshaan kalsooni is-aqoonsi la garan karo
- Carruurtu waxay bartaan inay la dhaqmaan wixii la xiriira kuwa kale, u naxariisasho iyo ixtiraam

### Carruurtu waxay dareemaan amaan, amni iyo kaalmayn

**Tani waa caddayn, tusaale ahaan, marka carruurtu:**

- Dhisaan ku xirnaan amni shakhsi ka dibna barayaal ka sii badan oo la yaqaan
- Isticmaal jadwal joogto ah oo wax ku oolla si ay u caawinto in la sameeyo safar-nololeed loo saadaaliyey si sahala
- Dareen iyo wax ka qabashada dareenka lahaanshaha la xiriirida baahidooda wixii qancin iyo caawima ah
- Asaas oo ilaali cilaaqaad la aamino oo ixtiraam leh, oo lala yeesho carruurta iyo barayaasha kale
- U muujiyaan si furan dareenkooda iyo fikradooda xagga is-dhexgalka kuwa kale
- Waxay wax ka yiraahdaan fikradaha iyo talooyinka kuwa kale
- Bilaabaan is-dhexgalka iyo la sheekaysiga barayaasla la aaminay
- Waxay si kalsooni ah u baaraan ulana falgalaan bay'ada dhinac jireed iyo bulsho dhinaac cilaaqaad iyo cayaar
- Waxay bilaabaan kagana qaybgalaan cayaar
- Waxay sahamiyaan xaaladaha aqoonsiga iyaga oo wax iska dhigaya

**Barayaashu waxay kor u qaadaan barashadan, tusaale ahaan, markay:**

- Aqoonsadaan waxna ugu qabtaan si taxadar leh carruurta su'aallahooda iyo calaamadahooda
- Wax uga qabtaan arrin si taxadar leh carruurta iskudaygooda si ay u bilaabaan isdhexgalka iyo sheekaysiga
- Taageeraan carruurta ku xirnaantooda amniga iyada oo lagu samaynayo cilaaqaad kobcinaya, diiran oo joogto ah
- Kaalmaynaya carruurta marka isbedel jiro lana buuxiyo faraqa u dhexeeya wixii la yaqaan iyo wixii aan la aqoon
- Ku dhisaan waxqabad korin ilmood oo dhaqan ahaan la qiimeeyey iyo sida wax lagu baranayo
- Ay yihiin kuwa la helli karo shucuur ahaan ayna taageeraan carruurta muujintooda fikirkooda iyo aragtidooda
- Aqoonsadaan in dareenkaas welwelka, cabsida iyo qanacsanaan la'aantu ay qaadato waqti lagu xaliyo
- Aqoonsadaan ilma walba keli ahaantiisa siyaalla wax ku oolla
- Ay la qaataan waqti isdhexgalka iyo la sheekaysiga  ilma walba

*Ku dar tusaalayaashaada adiga xaalladaada:*

NATIIJOOYINKA BARASHADA

## **NATIIJADA 1AAD:** CARRUURTU WAXAY LEEYIHIIN DAREENKA AQOONSIGA

### Carruurtu waxay yeeshaan madaxbanaani sii kordhaysa, isku-xirnaan, furfurnaan iyo dareen kaalmayneed

**Tani waa caddayn, tusaale ahaan, marka carruurtu:**

- Muujiyaan ogaansho soo siyaadaysa oo baahida iyo xuquuqda kuwa kale
- U furan yihiin loolanka cusub iyo ikhtiraaca
- Si siyaadaysa isku kaashadaan ulana shaqeeyaan kuwa kale
- Qaataan khatar muuqata go'aan samayntooda ayna wax ka qabtaan wax aan la filayn
- Aqoonsadaan guulahooda shakhsiyeed iyo guulaha kuwa kale
- waxay muujiyaan awood soo siyaadaysa oo is maamulida
- ku waajihida xaalladaha cusub si kalsooni leh
- Waxay ku wajahaan xaalladaha cusub si kalsooni ah
- Bilaabaan abaabulka wada xaajood iyo dabeecado wadaag
- Sii wadaan markay la kulmaan taxadiyo iyo marka isku daygii hore aanu shaqayn

**Barayaashu waxay kor u qaadaan barashadan, tusaale ahaan, markay:**

- Siiyaan carruurta istartaatiijiyada lagu sameeyo xalal laga warqabo oo ku saabsan dabeecada
- Kor u qaadaan dareenka carruurta oo lahaanshaha, isku-xirnaanta iyo samaqabka
- Yeeshaan filid sarre  ee iimaha kartidiisa
- Dhexdhexaadiyaan oo caawimaan carruurtu inay ka gorgortamaan xuquuqdooda wixii la xiriira xuquuqda kuwa kale
- Siiyaan fursado carruurta si ay ula falgalaan hawsha iyo cayaarta
- Ka muujiyaan farxad, dhiirigelin iyo raynrayn isku dayga carruurta
- Ay taageeraan ilmaha da'daalkiisa, iyaga oo caawimaya una dhiirigelinaya sida ugu haboon
- Kicinta iyo dhiirigelinta carruurta si ay u guulaystaan markay la kulmaan loolan
- Siiyaan waqti iyo masaafo si ay u hawlgeliyaan shakhsi iyo wax la wada qabanayo
- Dhisaan barasho dhaqan ahaan qiima leh oo ilmaha bulshadiisa
- Dhiirigeliyaan ilmaha si loo sameeyo waxay kala doortaan iyo go'aamo

*Ku dar tusaalayaashaada adiga xaalladaada:*

NATIIJOOYINKA BARASHADA

## **NATIIJADA 1AAD:** CARRUURTU WAXAY LEEYIHIIN DAREENKA AQOONSIGA

### Carruurtu waxay yeeshaan is-aqoonsi la garan karo iyo kalsooni

**Tani waa caddayn, tusaale, marka carruurtu:**

- Ay dareemaan in la aqoonsaday laguna ixtiraamay qofka ay yihiin
- Ay sahamiyaan aqoonsiya kala duwan iyo qodobo aragtiyeed oo cayaareed
- Ay wadagaan noocyada dhaqamadooda carruurta kale iyo barayaasha
- Ay isticmaalaan af guriga si loo sameeyo macne
- Isticmaal asaas adag xagga dhaqanka iyo af/afafka qoyska iyo bulshada guud iyaga oo aan ka tegyan aqoonsiga dhaqankooda
- Waxay horamariyaan hidaha dhaqan iyo bulsho iyaga oo la falgelaya dadka waaweyn iyo xubnaha bulshada
- Raadiyaan lana xiriiraan si ay u hellaan raxmad, caawimo iyo wehelnimo
- U dabaaldegaan oo wadagaan ku biirin iyo waxay gaareen kuwa kale

**Barayaashu waxay kor u qaadaan barashadaan, tusaale, markay:**

- Kor u qaadaan dareenka xoogan ee dhamaan carruurta waxay yihiin iyo ku xirnaantooda kuwa kale – aqoonsi la wadaago Australian ahaan
- Markay u xaqiijiyaan dhamaan carruurta qab iyo kalsooni guulahooda
- La wadaagaan guusha carruurta iyo qoysaskooda
- Muujiyaan ixtiraamka kala jaadnimada, iyaga oo aqoonsanaya juhdiga kala duwan ee carruurta, qoysaska, bulshada iyo dhaqamada
- Aqoonsadaan oo fahmaan in carruurtu dhisaan macnaha habab badan oo kala duwan
- Muujiyaan fahmid hoose oo ilma walba, qoyskiisa iyo xaallada bulshada xagga qorshaynta ilmaha barashadiisa
- Siiyaan carruurta tusaalayaalka aqoonsiga habab badan dhaqankana waa la aqoonsadaa lana muujiyaa
- Asaasaan juhdi dhaqan ahaan la qiimeeyo barashada
- Asaasaan aqoon, luqado iyo fahamid ay carruurtu keenaan
- La hadlaan carruurta habab ixtiraam leh kaas oo tarjumaya isku mid ahaanta iyo kala duwanaanta dadka
- Siiyaan macluumaad ballaaran oo kala duwan kaas oo ka tarjumaya carruurta adduunkooda bulsho
- Waxay dhegaystaan oo bartaan fahamka carruurta ee naftooda
- Si firfircoon u kaalmeeyaan dayactirka af guriga iyo dhaqanka
- Yeeshaan faham carruureed oo asal ah oo iyagu ay leeyihiin

*Ku dar tusaalayaashaada adiga xaalladaada:*

## NATIIJADA 1AAD: CARRUURTU WAXAY LEEYIHIIN DAREENKA AQOONSIGA

### Carruurtu waxay barataa inay kula macaamilaan kuwa si taxadar leh, u damqasho iyo ixtiraam leh

**Tani waa caddayn, tusaale ahaan, marka carruurtu:**

- Muujiyaan danaynta carruurta kale kana mid yihiin kooxo
- La falgalaan doorna ka qaataan waaya-aragnimada cayaar la wadaagayo
- Muujiyaan shucuurr kala duwan, fikrado iyo aragtiyo si wax ku oolla
- U damqadaan iyaga oo muujinaya dareen kuwa kale ah
- Soo bandhigaan ogaanshaha iyo ixtiraamida sida kuwa kale wax u arkaan
- Ka tarjumayaan ficiladooda ayna qadarinayaan waxay u keeni karto kuwa kale

**Barayaashu waxay kor u qaadaan barashadaan, tusaale, markay:**

- Abaabulaan isdhexgal shakhsi-shakhsi ah ee carruurta, khaasatan kuwa dhashay iyo kuwa koran, inta lagu jiro nolol maalmeedka
- Abaabulaan bay'ada barashada habab kor u qaadaya isdhexgalka kooxa yaryar iyo khibrada wada cayaarid
- Tilmaansadaan daryeelka, u damqashada iyo ixtiraamida carruurta, shaqaalaha iyo qoysaska
- Tilmaansadaan istaraatiiyada wada xiriirka tooska ah si loo kaalmeeyo carruurta loona abaabulo isdhexgal ayna ka mid noqdaan cayaar waaya-aragnimo bulsho habab ilaaliya cilaaqaad wax ku oolla ee carruurta kale
- Aqoonsadaan cilaaqaadka ballaaran ee carruurta waxayna si taxadar leh u faragashadaan siyaalla kor u qaada qadarinta xal kale iyo ka qaybgal bulsho.

*Ku dar tusaalayaashaada adiga xaalladaada:*

**Ka mid ahaansho:**
Waxay lug ku yeelata dhamaan carruurta bulshanimadooda, dhaqanka iyo kala-jaadnimada afka (ay ka mid yihiin hanaanka barashada, iinta, awooda, sinjiga, xaalladaha qoyska iyo goobaha meeleed) ee habka samaynta go'aanka manhajka. Ujeedadu waa in la xaqiijiyo in dhamaan carruurta waaya aragnimadooda la ictiraafo lana qiimeeyo. Ujeedadu waa in la xaqiijiyo in dhamaan carruurtu leeyihiin helid siman ee khayraadka iyo ka qaygalka, iyo fursadaha lagu muujinayo luqadooda lana qiimeeyo kala duwanaanshahooda.

NATIIJOOYINKA BARASHADA

## **NATIIJADA 2AAD:** CARRUURTA WAA KU XIRAN YIHIIN DOORNA KA QAATAAN ADDUUNKOODA

Waaya-aragnimada cilaaqaadka iyo ka qaybgalka xagga bulshada waxay door ka qaataan lahaanshaha carruurta, ahaanshaha iyo noqoshada. Laga bilaabo dhalashada carruurtu waxay bartaan nolosha iyo barashada kuwa kale oo ka tirsan bulshooyin kala duwan. Kuwaas waxaa ku jiri kara, bulshooyinka maxaliga ah ama goobaha ilmanimada hore. Yeelashada dareen wax ku oolla oo aqoonsi iyo helista ixtiraam, cilaaqaad wax qabanaya oo xoojinaya inuu ilmuhu wuxuu danaynayo iyo xirfadaha inaad tahay oo aad noqonayso kuwa door fiican ka qaadanaya adduunkooda. Marka carruurtu galaan ilmanimo hore waxay ballaariyaan waaya-aragnimadooda ka qaybgalayaal ahaan cilaaqaad kala duwan iyo bulshooyin.

Marka waqtigu sii socdaba kala duwanaanta iyo baaxada dariiqooyinka carruurtu ugu xirmaan ugana qayb galaan kuwa kale ayaa siyaada. Carruurtu waxay kaga qaybgalaan ilka caddayn, oohin, iska eyelid, iyo samaynta codad si ay uu muujiyaan heerkooda danaynta ama kala qaybgalka kuwa kale. Kuray-yadu waxay kala qaybgalaan kuna xirmaan kuwa kale sida sida siinta waxay ku cayaaraan ilma caraysan ama waxay ku soo dhoweeyaan ilmaha cusub si xiisa leh. Carruurta waaweyni waxay muujiyaan danayn sida kuwa kale u qadariyaan iyaga iyo fahamka saaxiibnimada. Waxay yeeshaan fahamka in ficiladoodu ama jawaabahoodu wax yeelayaan sida kuwa kale dareemaan ama kala kulmaan lahaanshaha.

Marka barayaashu abuuraan bay'ad taas oo carruurtu la kulmaan wax lagu raaxaysan karo, daryeelaya cilaqaad wanaagsana lana leh dadka iyo bay'ada, carruurtu waxay wax uga qabtaan si waafaqsan. Marka carruurtu ka qaybgasho si iskaashi leh hawl walba oo joogta ah, munaasabadaha iyo waaya-aragnimada iyo fursadaha ay kaga qaybqaadanayaan go'aanada, waxay bilaabaan inay u noolaadaan si madax banaan.

Isku xirnaanta carruurta iyo siyaalla kala duwan u lahaanshaha dad, wadan iyo bulsho waxay ka caawintaa iyagu inay bartaan siyaabaha ahaanshaha taas oo ka tarjunta qayimka, caadada iyo hab-dhaqanka qoysaskooda iyo bulshada. Muddo ka dib waxay wax ka bedelaysaa siyaallaha ay ula dhaqmaan kuwa kale.



## **NATIIJADA 2AAD:** CARRUURTA WAA KU XIRAN YIHIIN DOORNA KA QAATAAN ADDUUNKOODA

- Carruurtu waxay yeeshaan dareen lahaansho kooxo iyo bulshooyin iyo fahamka xuquuqda la kala mudan yahay iyo masuuliyaadka muhiimka u ah ka qaybgal bulsho oo muhiima
- Carruurtu kala jaadnimada si ixtiraam leh ayay u soo dhoweeyaan
- Carruurtu waxay noqdaan kuwa ogsoon xaqa
- Carruurtu waxay noqdaan kuwa bulsho ahaan masuula oo u muujiya bay'ada

### Carruurtu waxay abuuraan dareen lahaanshaha kooxeed iyo bulshooyin iyo fahamka xuquuqda is dhaafsiga iyo masuuliyaadka muhiimka u ah ka qaybgal firfircoon oo bulshada

**Tani waa caddayn, tusaale, marka carruurtu:**

- Bilaabaan inay aqoonsadaan inay xaq u leeyihiin yeelashada bulshooyin badan
- Iskaashi la sameeyaan kuwa kale kuna gorgortamaan heerar iyo cilaaqaad lagu muujiyey cayaar iyo waaya-aragnimo kooxeed
- Waxay qaataan talaabo si ay uga caawimaan carruur kale inay ka qaybgalaan kooxaha bulshada
- Waxay xoojiyaan fahamkooda adduunka ay ku nool yihiin
- Waxay muujiyaan aragtida arrimah iyaga waxyeellaya
- Dhistaan waaya-aragnimadooda bulsho si u sahamiyaan siyaalla kale oo ahaanshaha
- Waxay ka qaybgalaan cilaaqaad is-weydaarsi ah
- Waxay si soo kordhaysa u bartaan 'inay akhriyaan' dabeecadaha kuwa kale si wanaagsan ayayna wax uga qabtaan
- Waxay fahmaan siyaalla kala duwan oo door looga qaato mashruuc iyo cayaara ahaan.
- Waxay muujiyaan dareen lahaansho iyo ku qanacsanaanta mashruucyada
- Waa cayaar badan yihiin si fiican ayayna kuwa kale wax ugu qabtaan, iyaga gaaraya hay'ad ahaan iyo saaxiibo
- Waxay door ka qaataan samaynta go'aan xaq ah wixii ku saabsan arrimaha iyaga saameeya.

**Baarayaashu waxay kor u qaadaan barashadan, tusaale ahaan, markay:**

- Kor u qaadaan dareen bulsho ilmanimada hore
- Waxay dhisaan isku-xirnaanta u dhexaysa ilmanimada hore iyo bulshada agagaaraha
- Siiyaan fursadaha carruurta ay ku baaraan fikrado, aragtiyo ballaran iyo arrimo anshax kuwaas ku taxaluqda noloshooda iyo bulshada agagaarkooda ah
- Abuuraan luqad carruurtu isticmaali karaan si ay u sharxaan fikrado, uga gorgortamaan doorar iskana kaashadaan si ay gaaran goolashooda
- U xaqiijiyaan in carruurtu leeyihiin xirfado si ay uga qaybgalaan siyaalla waxtar leh wada xaajood koox ahaaneed iyo samaynta go'aan la wadaagayo wixii ku saabsan shuruucda iyo waxa la filayo

*Ku dar tusaalayaashaada adiga xaalladaada:*

NATIIJOOYINKA BARASHADA

## **NATIIJADA 2AAD:** CARRUURTA WAA KU XIRAN YIHIIN DOORNA KA QAATAAN ADDUUNKOODA

### Carruurtu kala jaadnimada si ixtiraam ayay wax uga qabtaan

**Tani waa caddayn, tusaale ahaan, markay carruurtu:**

- Bilaabaan inay muujiyaamn dareenka kuwa kale
- Sahamiyaan kala-jaadnimada, hidaha, asalka iyo dhaqanka  iyo in kala jaadnimadu keento fursadoh la kala dooranayo iyo faham cusub
- Fahmaan isku xirnaanta, midnimada iyo faraqyada u dhexeeya dadka
- Ay dhegaystaan aragtida kuwa kale una ixtiraam siyaalla kala duwan oo ahaansho iyo samayn
- Sameeyaan siyaalla laga wada mid yahay oo lagu gaaro wadajir
- Ogaadaan waxna ka qabtaan siyaalla wax ku oolla oo kala duwanaansho iyo isku mid ahaansho dadka dhexdiisa ah

**Barayaashu waxay kor u qaadaan barashadaan, tusaale ahaan, markay:**

- Tarjumaan siday iyagu wax uga qaban lahaayeen kala-jaadnimada
- Qorsheeyaan oo siiyaan macluumaad xoojiya rajada ilmaha kuna dhiirigeliyaan qadarinta kala-jaadnimada
- U soo bandhigaan carruurta luqada badan iyo lahjado kuna dhiirigeliyaan qadarinta kala-jaadnimada luqadaha
- Ku dhiirigeliyaan carruurta inay dhegaystaan kuwa kale ayna ixtiraamaan aragtiyaha kala duwanaanta
- U muujiyaan jawaaba wax ku oolla kala-jaadnimada dabeecadooda iyo la sheekaysiga carruurta
- Carruurta la sameeyaan isdhexgal kor u qaada ixtiraamka kala jaadnimada iyo qiimaynta carruurta
- Sahamiyaan dhaqanka, hidaha, asalka iyo dhaqanka ilma walba sida waafaqsan bulshadooda
- La sahamiyaan carruurta fikradooda wixii ku saabsan kala-jaadnimada

*Ku dar tusaalayaashaada adiga xaalladaada:*

NATIIJOOYINKA BARASHADA

## **NATIIJADA 2AAD:** CARRUURTA WAA KU XIRAN YIHIIN DOORNA KA QAATAAN ADDUUNKOODA

### Carruurtu waxay bartaan xaqsoorka

**Tani waa caddaynta, tusaale ahaan, marka carruurtu:**

- Ikhtiraacaan oo sahamiyaan isku xirnaanta qaarkeed dadka dhexdiisa
- Ogaato siyaallaha dadka loogu daro ama looga reebo bay'adaha jireed ama bulsho
- Yeeshaan awooda lagu aqoonsado xaqsoor la'aanta iyo eexda iyo awooda loogu shaqeeyo raxmad iyo naxariis
- Loogu xoojiyo si loo sameeyo wax la kala dooranayo iyo xalin dhibaato si wax looga qabto baahidooda si gaara
- Bilaabaan inay si adag uga fekeraan wixii ku saabsan dabeecada xaqa ah ama aan xaqa ahayn
- Bilaabaan inay fahmaan oo qiimeeyaan siyaallaha qoraalku u dhiso aqoonsi una abuuro humaaga wax u taagan

**Barayaashu waxay kor u qaadaan, tusaale ahaan, markay:**

- Dareemaan oo si degan u dhegaystaan welwelka carruurta kalana hadlaan aragtida kala-jaadnimada arrimaha ka mid ahaanta iyo baxsanaanta iyo dabeecada xaqa iyo xaqdarada
- Carruurta la sameeyaan wada hadal ku saabsan xiriir sinaan ah oo ixtiraam leh sida marka ilmo ku habsado isticmaalka wixii la haysto
- Taxliiliyaan kalana hadlaan ilmaha siyaallaha qoraalku u dhisay kala duwanaansha xadadan ayna xoojiyaan humaaga wax u taagan
- Markay ilmaha u soo jeediyaan arrimaha xaqsoorka iyaga la xiriira ee ilmanimada hore iyo bulshada

*Ku dar tusaalayaashaada adiga xaalladaada:*

NATIIJOOYINKA BARASHADA

## **NATIIJADA 2AAD:** CARRUURTA WAA KU XIRAN YIHIIN DOORNA KA QAATAAN ADDUUNKOODA

### Carruurtu waxay noqdaan kuwa bulsha ahaan masuul ah waxayna muujiyaan ixtiraamka bay'ada

**Tani waa caddayn, tusaale ahaan, marka carruurtu:**

- Ay isticmaalaan cayaar si ay baaraan, mashruuca oo baaraan aragtiyo cusub
- Ka qaybqaataan kuwa kale si loo xaliyo dhibaatada waxna loogu biiriyo natiijooyinka kooxaha
- Ay muujiyaan aqoon soo siyaadaysa, ayna ixtiraamaan dabeecada iyo bay'adaha la dhisay
- Sahamiyaan, xawilaan, saadaaliyaan oo maleeyaan si loo hormariyo faham siyaadaya ee isku xirnaanta u dhexaysa dhulka, dadka iyo dhirta iyo xawayaanka.
- Waxay muujiyaan qadarin soo kobcaysa iyo daryeelka dabeecada bay'ad aan dabiici ahayn
- Ay sahamiyaan cilaaqaadka noolaha iyo ma-noolaha dushana kala socdaan, fiira u yeeshaan una debcaan isbedelka
- Yeeshaan la socodka saamaynta aadamiga ee bay'ada iyo isku-tiirsanaanta waxyaallaha nool

**Barayaashu waxay kor u qaadaan, tusaale ahaan, markay:**

- Siiyaan carruurta inay ka helaan bay'adooda qalab badan oo dabiici ah
- U hayaan ixtiraam, daryeel iyo qadarin bay'ada dabiiciga ah
- Helaan siyaalla awood u siinaya carruurta daryeel ayna bartaan dhulka
- Qadariyaan dabeecada ku xirnaanta carruurta dhulka ayna u muujiyaan ixtiraam borotakoolka bulshada
- La wadaagaan macluumaad ayna siiyaan carruurta inay helaan macluumaad ku saabsan bay'ada iyo saamaynta dhaqdhaqaaqa bay'ada
- Ku xiraan waaritaanka dabeecada hawlmaalmeedka iyo waxqabadka
- Ay raadiyaan tusaalayaalka isku-noolaanta bay'ada kana hadlaan siyaalaha nolosha iyo ku noolaanta caafimaad ay isku xiran yihiin

*Ku dar tusaalayaashaada adiga xaalladaada:*

NATIIJOOYINKA BARASHADA

## NATIIJADA 3AAD:
## CARRUURTU WAXAY LEEYIHIIN DAREEN XOOGAN OO SAMAQAB AH

Samaqabku wuxuu ku xiran yahay arrimaha maanka iyo jirka wuxuuna xudun u yahay lahaanshaha, ahaanshaha iyo noqoshada. La'aanta dareen xoogan oo samaqab ah way adag tahay inaad yeelato dareen lahaansho, inaad aaminto kuwa kale una yeelato kalsooni ahaansho, si rajo lehna u samayso waaya-aragnimo door ka qaadata noqoshada.

Samaqabka waxaa ku jiray caafimaad jireed oo fiican, dareen farxadeed, qanacsanaan iyo bulsho u shaqaynaysa si guul leh. Waxay saamaysaa dariiqada carruurtu ay ula falgalaan bay'ada . Dareen xoogan oo samaqab ah ayaa siiya carruurta kalsooni iyo raja wanaag taas oo xoojisay barashadooda. Waxay dhiirigelisaa horumarka carruurta hamigooda wax ogaanta, dareen kaalmo iyo rabitaanka la falgalka kuwa kale oo raba.

Samaqabku wuxuu xiriir la leeyahay furfurnaanta, siinta carruurta awooda ay wax kaga qabtaan loolanka nolol maalmeedka. Diyaar u ahaanta u dhabar adayga markaad la kulanto barasho loolan leh iyo xaallad aadan aqoon waxay abuurtaa fursada guusha iyo guul gaar.

Barashada carruurta iyo horumarka jireed waa caddaynta astaamaha dhaqdhaqaaqooda laga bilaabo ku tiirsanaanta jirka iyo falalka jawaab celinta dhalashada, ilaa xoojinta dareenka, dhaqdhaqaaqa iyo nadaamka fahamka abaabulan, dhaqdhaqaaq jireed oo xakamaysan labada ujeedaba iyo ku raaxaysigaba.

Samaqabka carruurta waxaa waxyeelli kara dhamaan waaya-aragnimada ka jirta gudaha iyo dibada labadaba. Si loo kaalmeeyo barashada ilmaha, waa muhiim in barayaashu wax ka qabtaan samaqabka ilmaha iyaga oo siinaya raxmad, cilaaqaad la aamino, bay'ad amaana oo la sadaalin karo, ta'kiidin iyo ixtiraam dhamaan xaallada jireed, shucuureed, bulsho, faham, luqad, hal abuur iyo shakhsi ahaansho. Iyada oo la aqoonsanayo ilma walba dhaqankiisa iyo aqoontiisa bulsho, iyo si taxadaran wax uga qabashada xalladooda shucuureed, barayaashu waxay dhisaan kasloonida ilmaha, dareenka samaqabka iyo rabitaanka isku hawlida barashada.

Furfurnaanta carruurtu yeelanayso iyo awoodooda si loo sameeyo masuuliyad sii siyaadaysa oo is caawin ah iyo nadaam caafimaad oo asaasi ah waxay kor u qaadaan madaxbanaani iyo kalsooni. Markay arkaan inay daryeellayaan barayaal iyo kuwa kale, waxay ogaadaan muhiimada kuwa kale inay ula noolaadaan waxna ula bartaan si isku-tiirsanaan ah.

Barahsada ku saabsan hanaan-nololeed caafimaadka qaba, oo ay ku jiraan nafaqo, saxa shakhsiyeed, shucuur iyo cilaaqaad bulsho ayaa sal u ah samaqabka iyo isku-kalsoonaanta. Samaqabka jireed wuxuu ku kordhiyaa awooda carruurta inay feejignaandaan, iskaashadaan oo wax bartaan. Marka carruurtu noqoto kuwa madaxbanaan waxay ka qaadi karaan masuuliyad weyn caafimaadkooda, saxadooda iyo daryeelka shakhsiyeed waxayna noqdaan kuwa ku baraarugsan amaanka naftooda iyo kuwa kale. Waxyaallaha soo noqnoqonaya ayaa siiya fursado ilmaha si uu u barto wixii la xiriira caafimaadka iyo amaanka. Nafaqada wanaagsan ayaa muhiim u ah caafimaad ku noolaanta waxayna u ogolaata ilmuhu inuu noqdo ka qaybqaate firfircoon oo cayaarta. Goobta ilmanimada hore waxay siisaa fursada badan carruurta si ay u ogaadaan cuntooyin caafimaad oo kala duwan una bartaan kala doorashada cuntada barayaasha iyo carruurta kale. Xarakaadka jireed iyo feejignaan siinta xirfado socod waxay siisaan carruurta asaaska kororkooda madaxbanaanida iyo qanacsanaanta inay awoodaan inay u sameeyaan waxyaallo naftooda.



## NATIIJADA 3AAD: CARRUURTU WAXAY LEEYIHIIN DAREEN XOOGAN OO SAMAQAB AH

- Carruurtu waxay noqdaan kuwa xoogan dhinaca bulshada iyo shucuurta samaqabka
- Carruurtu waxay qaadaan masuuliyad soo siyaadaya ee caafimaadkooda iyo samaqabka jirkooda

### Carruurtu waxay noqdaan kuwa ku adag samaqabkooda shucuuree iyo bulsho

**Tani waa caddayn, tusaale ahaan, marka carruurtu:**

- Muujiyaan aaminid iyo kalsooni
- Ay noqdaan kuwa helli kara kuwa kale waqtiyada rafaadka, jaahwareerka iyo niyadjab ama caalwaa'
- Wadaagaan kaftan, farxad iyo qanacsanaan
- Ay raadiyaan oo aqbalaan loolan cusub, ay sameeyaan ikhtiraac cusub una dabaaldegaan da'daalkooda iyo guushooda iyo tan kuwa kale si siyaadaysana isu kaashadaan ulana shaqeeyaan kuwa kale
- Ku raaxaystaan waqtiyada kelinimada ah
- Aqoonsadaan waxay gaareen koox iyo shakhsi ahaan
- Ay kala doortaan, codsadaan loolanka, ay qaataan khataro, maareeyaan isbedelka oo ay la tacaalaan rafaadka iyo waxa aan la filanayn
- Ay muujiyaan karti soo siyaadaysa si ay u fahmaan, isu-saxaan una maareeyaan shucuurtooda siyaalla ka tarjumaya dareenka iyo baahida kuwa kale
- Waaya-aragnimada iyo wadaagida guusha shakhsiyeed xagga barashada iyo abuurista fursado barasha cusub ee af guriga ama Mustawaha Ingiriiska Australiyaanka
- Aqoonsadaan oo aqbalaan ta'kiidinta
- Ku adkaystaan awoodooda iyo madaxbanaanidooda markay muujinayaan ogaansho soo siyaadaya oo baahida iyo xuquuda kuwa kale
- Waxay aqoonsadaan ku biirinta ay ku sameeyaan mashruucyada la wadaagayo iyo khibradaha

**Barayaashu waxay kor u qaadaan barashadan, tusaale ahaan, markay:**

- U muujiyaan debecsanaan, faham iyo ixitiraam dhamaan carruurta
- La shaqeeyaan carruurta si ay u diiwaangeshaan waxay qabteen ayna la wadaagaan qoysaskooda waxay qabteen
- Ay xaqiijiyaan inay dhamaan carruurt adareemaan farxad markay isku deyayaan inay guulaystaan
- Kor u qaadaan dareenka carruurta ee lahaanshaha, ku xirnaanta iyo samaqabka
- La loolamaan oo taageeraan carruurta si looga qaybgeliyo hawsha iyo cayaarta
- Dhisaan oo fidiyaan fikradooda
- Leeyihiin filitaan sarre oo ilma walba kartidiisa
- Qiimeeyaan ilmaha go'aan samayntiisa shakhsiyeed
- Soo dhoweeyaan carruurta iyo qoysaska wadaagaya waxyaallo ka mid ah dhaqankooda iyo noloshooda ruuxiga ah
- Kala hadlaan carruurta wixii dareenkooda ah waxna ka yiraahdaan munaasabado looga jeedo taageerida fahamkooda shuruucda shucuureed iyo is-xakamaynta
- Aqoonsadaan oo ta'kiidiyaan da'daalka carruurta iyo korida
- Dhexdhexaadiyaan oo caawimaan carruurta si ay ula gorgortamaan xuquuqdooda wixii khuseeya xuquuqda kuwa kale

*Ku dar tusaalayaashaada adiga xaalladaada:*

NATIIJOOYINKA BARASHADA

## **NATIIJADA 3AAD:** CARRUURTU WAXAY LEEYIHIIN DAREEN XOOGAN OO SAMAQAB

### Carruutu waxay qaataan masuuliyad weyn oo caafimaadkooda iyo samaqabkooda jireed

**Tani waa caddayn, tusaale ahaan, marka carruurtu:**

- Aqoonsadaan lana xiriiraan baahidooda jireed (tusaale ahaan, haraad, gaajo, nasasho, qanacsanaan, dhaqdhaqaaq jireed)
- Yihiin farxaan, caafimaad, amaan kuna xiran yihiin kuwa kale
- Ku lug leeyihiin si soo kordhaysa xirfad dhaqdhaqaaq oo ballaran iyo astaamaha xarakaadka
- Isku daraan dhaqdhaqaaq socod ah iyo isu-dheelitir si ay u gaaraan astaama ballaaran oo xarakaadyo ay ka mid yihiin dhaansi, xarakaad hal abuur ah iyo daraama
- Isticmaalaan awoodooda dareen iyo dabiici ahaan iyo isku-dhafnaan siyaadaysa, xirfado iyo ujeedo lagu sahaminayo waxna looga qabanayo adduunkooda
- Muujiyaan ogaanshaha agagaarkooda ayna is-hagaan, iyaga oo ku wareegaya bay'adooda si kalsooni ah amaana ah
- Adeegsadaan qalabka oo maareeyaan agabka si yaadaysa aadna u fiican iyo xirfad
- Ka jawaabaan dhaqdhaqaaq muyuusiga dhaqameed iyo kan casriga ah, dhaansiga iyo sheegida sheekada
- Muujiyaan madaxbanaani siyaadaysa iyo ku wanaagsanaanta saxada shakhsiyeed, daryeel iyo amaan noloshooda iyo kuwa kale
- Muujiyaan rabitaan ka qaybgal xagga cayaarta jireed iyo waanwaanta goobta si loo xaqiijiyo amaanka iyo samaqabka naftooda iyo kuwa kale

**Barayaashu waxay kor u qaadaan barashadan, tusaale ahaan, markay:**

- Qorsheeyaan kana qaybgalaan xarakaad jireed oo firfircoon oo carruurta, ay ku jiraan dhaansi, daraama, dhaqdhaqaaq iyo gaymam
- Ka soo qaataan qoyska iyo bulshada iyo khubarada ay ku jiraan gaymamka la yaqaan iyo xarakaadka jireed ee cayaarta
- Siiyaan aallada kala duwan iyo qalab si wax loogu taro carruurta xirfadahooda jireed
- Markay firfircoon u kaalmeeyaan carruurta si ay u bartaan wax ka qabadka saxada
- Kor u qaadaan sii wadida caafimaadka shakhsiyeed ee carruurta iyo saxada iyaga oo la wadaagaya lahaanshaha iyo jadwalada carruurta, qoysaska iyo bulshada
- Kala hadlaan arrimaha amaanka iyo caafimaadka carruurta kalana qaybgalaan xagga horumarinta tusayaasha si loo xafido bay'ada inay u ahaato amaan dhamaan
- Carruurta u sameeyaan khibrado, sheekooyin iyo waxyaalla joogta ah oo kor u qaada hanaan nololeedka caafimaadka iyo nafaqa wanaagsan
- U habeeyaan oo xoojiyaan caafimaadka, nafaqada iyo wax ka qabashada saxada shakhsiyeed iyo carruurta
- Siiyaan xarakaad iyo nasasho badan maalinta oo dhan waxayna caawimaan carruurta si loo sameeyo go'aana wax ku oolla wixii khuseeya ka qaybgalka

*Ku dar tusaalayaashaada adiga xaalladaada:*



## **NATIIJADA 4AAD:** CARRUURTU WAA ISKU KALSOON YIHIIN WAANA BARTAYAAL KA QAYBQAATA

Dareen amni iyo samaqab wanaagsan ayaa siiya carruurta kalsoonida tijaabada iyo sahaminta iyo isku deyida fikradaha cusub, sida dhisida kalsoonidooda iyo noqoshada mid firfircoon iyo ka qaybgelid ku lug leh xagga barashada. Carruurtu waxay u badan tahay inay isku kalsoon yihiin lugna ku leeyihiin bartayaasha marka qoyskooda iyo bulshada ay qabsato fahamkana la aqoonsado laguna daro ilmanimada hore. Tani waxay caawintaa iyagu inay sameeyaan isku xirnaan ayna macne ka sameeyaan khibrada cusub.

Carruurtu waxay isticmaalaan habab sida sahamin, la shaqayn iyo dhibaato xalin dhamaan xaalladah manhajka. Yeelashada dabeecada sida wax walba raadinta, ku adkaysiga iyo hal abuurku wuxuu u suurtageliyaa carruurta inay ka qaybgalaan waxna ka bartaan barashada. Bartaayasha firfircoon ayaa iyaguna awoodi doonaa inay xawilaan lana qabsadaan waxay xaallad ka barteen si ay meeleeyaan una isticmaalaan macluumaadka barashada.

Jawi barasho oo firfircoon ee hab kaalmaynaya, carruur isku kalsoon iyo barayaal ku lug leh ayaa si soo siyaadaysa u awoodaya inay u qaataan masuuliyada waxbarashadooda, sharci shakhsiyeed iyo ku biirinta jawi bulsho. Isku xirka iyo sii wadida u dhexaysa khibrada barashada gooba kala duwan ka dhigaya barashada mid macna samaynaysa oo siyaadinaysa dareenka carruurta ee lahaanshaha.

Carruurtu waxay yeeshaan faham naftooda ah iyo adduunkooda baaritaan firfircoon oo gacan ku hayna. Jawi barasho oo firfircoon oo kaalmaynaya ayaa ku dhiirigeliya carruurta hawlgalka xagga barashada taas oo la aqoonsan karo iyada oo feejignaan iyo diirad saarid la siinayo waxay danaynayaan. Carruurtu waxay keenaan ahaanshahooda waxbarashadooda. Waxay leeyihiin siyaallabadan oo ay u arkaan adduunka, habab kala duwan oo waxbarasho iyo hanaan waxbarasho oo ay iyagu door bidayaan.

Lug ku yeelasho firfircoona ee waxbarashada waxay dhistaa fahamka carruurtu u arkaan iyo feker hal abuur leh iyo hab waxweydiin oo lagama maarmaan u ah barashada. Waxay loolan ku sameeyaan oo fidiyaan tooda, iyo aragtida kuwa kale, waxay abuuraan aqoon cusub xagga is-dhexgal la iskaashanayo iyo gorgortan. Carruurta lug ku yeelashadooda firfircooni waxay isbedeshaa waxay yaqaaniin, lana qaban karo, ay qiimeeyaan waxayna isbedel ku sameeyaan barashadooda.

Barayaashu waxay aqoonsadeen in ilmaha shakhsi ahaan ay muhiim u tahay siinta bay'ad iyo waaya-aragnimo xoojinaysa barashada carruurta.

## **NATIIJADA 4AAD:** CARRUURTU WAY ISKU KALSOON YIHIIN WAANA BARTAYAAL KA QAYBQAATA

- Carruurtu waxay yeeshaan dabeecad ay ku bartaan sida isku deyida inay ogaadaan, iskaashiga, kalsoonida, hal-abuurka, ka go'naanta, danaynta, ku adkaysiga, malaynta iyo aragti soo celinta
- Carruurtu waxay yeeshaan xirfada kala duwan iyo habab sida xalinta dhibaatada, waxweydiinta, tarjumida, mala awaalida, cilmi baarista iyo baarida.
- Carruurtu waxay gudbiyaan oo qabatimaan waxay ka barteen xaalladaha soo maray
- Carruurtu waxay u isticmaalaan waxay barteen inay ugu xirmaan dadka, goobta, teknoolojiga iyo dabeecada iyo qalabka la warshadeeyey

### Carruurtu waxay yeeshaan dabeecad ay ku bartaan sida isku deyida inay ogaadaan, iskaashiga, kalsoonida, hal-abuurka, ka go'naanta, danaynta, ku adkaysiga, malaynta iyo aragti soo celinta

**Tani waa caddayn, tusaale ahaan, marka carruurtu:**

- Muujiyaan la yaab iyo xiisayn bay'adooda
- Rabaan inay ogaadaan wax walba una riyaaqsan yihiin barashadooda
- Ay isticmaalaan cayaar ay ku baaraan, maleeyaan kuna sahamiyaan fikrado
- Ku raacaan kuna fidiyaan waxay danaynayaan riyaaqsanaan, tamar iyo feejignaan
- Waxay bilaabaan doorna ka qaataan si ay u cayaaraan firado ayaa ka imanaya
- Ka qaybgalaan waaya-aragnimo waxweydiin ku salaysan oo macna samaynaya oo kala duwan
- U dhabar adaygaan oo dareemaan ku qanasanaanta guusha
- Ku adkaystaan xataa markay la kulmaan shaqa qalafsan

**Barayaashu waxay kor u qaadaan barashadan, tusaale ahaan, markay:**

- Aqoonsadaan oo qiimeeyaan qiimaha ka qaybgalka carruurta ee barashada
- Bixiyaan bay'ad waxbarasho taas oo ah mid furfurmi karta oo furan
- Wax ka sameeyaan soo bandhigida carruurta xagga dabeecada iyaga oo wax ka oranaya iyaga oo siinaya dhiirigelin iyo fikrado siyaada ah
- Dhiirigeliyaan carruurta si ay ugu hawlgeliyaan si gaara ah iyo hab barasho oo iskaashi sahamineed leh
- Ay u dhegaystaan si degan carruurta fikradooda ugalana hadlaan iyaga sida fikradaan loo sii ballaarin karo
- Siiyaan carruurta fursadaha ay dib ugu noqdaan fikradahooda una ballaariyaan siday wax u arkaan
- Sameeyaan hab waxweydiineed, sida la yaab, wax ka gungaarid iyo malayn, isku deyida fikrada cusub iyo qaadashada loolan cusub
- U muujinta carruurta siday wax u barteen iyo waxay barteen
- Dhisaan aqoontooda, luqadooda iyo fahamkooda in carruurtu keenaan ilmanimadooda hore
- Sahamiyaan kala duwanaanta dhaqanka iyo aqoonsiga bulsho
- Kor u qaadaan dareenka xoogan ee carruurta ee la xiriira waxay yihiin iyo ku xirnaantooda kuwa kale – sida aqoonsiga la wadaagayo Australian ahaan

*Ku dar tusaalayaashaada adiga xaalladaada:*

NATIIJOOYINKA BARASHADA

## **NATIIJADA 4AAD:** CARRUURTU WAY ISKU KALSOON YIHIIN WAANA BARTAYAAL KA QAYBQAATA

**Carruurtu waxay hor u mariyaan xirfadaha iyo qaababka sida xalinta, waxweydiinta, tijaabinta, mala-awaalida, cilmi baarista iyo baarida**

**Tani waa caddayn, tusaale ahaan, marka carruurtu:**

- Dabakhaan feker istaraatiiji oo aad u kala duwan si wax looga qabto xaallado looguna xaliyo dhibaatooyin, laguna qaato istaraatiijiyinkaan si loogu cusboonaysiiyo xaallada cusub
- abuurto oo isticmaasho wax u taagan shey si loo abaabulo, diiwaangeliyo lagulana xiriiro fikrado xisaabeed iyo waxa la qabo
- sameeyaan saadaalin iyo caamayn la xiriirta wixii ku saabsan shaqa maalmeedkooda, dhinaca adduunka dabiiciga ah iyo bay'ada, iyagoo isticmaalaya astaamo ay curiyeen ama aqoonsadeen ayna kula xiriiraan luqad xisaabeed iyo astaamo
- waxay sahamiyaan bay'adooda
- waxay ka shaqaysiiyaan sheeyada waxayna tijaabiyaan sababta iyo maxsuulka, iskudeyid iyo qalad, iyo dhaqaaq
- waxay si wax ku oolla ugu biiriyaan wadaxaajoodyo xisaabeed iyo dood
- waxay isticmaalaan feker tarjumo ah si loo eego siyaallaha wax u dhacaan iyo wixii laga baran karo waaya-aragnimadaas

**Barayaashu waxay kor u qaadaan barashadan, tusaale ahaan, markay:**

- Qorsheeyaan bay'ada barashada oo leh heerar ku haboon oo loolan halka carruurta lagu dhiirigeliyo inay sahamiyaan, tijaabiyaan oo qaadaan halis ku haboon markay waxbaranayaan
- Aqoonsadaan fahamka xisaabeed oo ay carruurtu keenaan barashada una dhisaan sidaas taas oo la xiriirta ilma walba
- Siiyaan carruurta iyo gurboodka macluumaad bixinaya loolan, mu'aamaraad iyo la yaab, waxayna kaalmeeyaan baaridooda waxayna la wadaagaan raaxaadooda.
- Siiyaan waaya-aragnimo dhiirigelisa carruurta si loo baaro loona xaliyo dhibaatada
- Dhiirigeliyaan inay carruurtu isticmaalaan luqad si ay u qeexaan una sharxaan fikradooda
- Siiyaan fursada lug ku yeelashada waaya-aragnimada kaalmaysa baarida fikradaha, aragtida ballaaran iyo fekerka, sababaynta iyo mala-awaalka
- Ku dhiirigeliyaan carruurta si ay ugu sameeyaan fikradooda iyo aragtidooda muuqata kuwa kale
- Qaabeeyaan xisaabaadka iyo luqada sayntifiga ah iyo luqada la xiriirta farshaxanka
- Ka qaybgalka cayaarta carruurta iyo sababaynta sida loo samaynayo, saadaalinta iyo tarjumida habka wax u dhacayaan iyo luqada
- Si ula kac ah u qaabaynta fahamka carruurta
- u dhegaystaan si degan carruurta isku daygooda inay qiyaasaan oo fidiyaan fahamkooda iyaga oo ku samaynaya sheekaysi iyo su'aal weydiin

*Ku dar tusaalayaashaada adiga xaalladaada:*

## **NATIIJADA 4AAD:** CARRUURTU WAY ISKU KALSOON YIHIIN WAANA BARTAYAAL KA QAYBQAATA

### Carruurtu waxay xawilaan oo qaayibaan waxay ka barteen hal xaalo ama mid kale

**Tani waa caddayn, tusaale ahaan, marka carruurtu:**

- hawl geliyaan dibna u abaabulaan barashada
- horay u mariyaan awooda dib loogu eego, lagu celiyo laylisna lagu sameeyo ficilada kuwa kale isla markiiba ama muddo ka dib
- isku xiraan waxa u dhexeeya khibradaha, aragtida iyo hababka wax u dhacaan
- Isticmaasho habka cayaarta, dib u eegida iyo baarista si loo xaliyo dhibaatooyin
- Dabakhaan si guud u eegid iyada oo xaallad walba ahmiyad gaara la siinayo
- Isku dayaan istaraatiijiya ahayd wax ku ool si loogu xaliyo dhibaatooyin hal xaallad arrin cusub
- Xawilaan aqoonta iyada oo xaallad walba ahmiyadeed la siinayo

**Barayaashu waxay kor u qaadaan barashadaan, tusaale ahaan, markay:**

- Qiimaynayaan calaamadaha carruur u dabakhaysa barashadooda siyaalla cusub kalana hadlaya iyaga siyaalla la koray fahamkooda
- Kaalmeeyaan carruur si ay u dhisaan xalal kala dawn dhibaatooyinka ayna isticmaalaan siyaalla kala duwan oo fekerka
- U soo qaataan carruurta digtoonidooda astaamo iyo cilaaqaad xagga bay'ada iyo barashadooda
- U qorsheeyaan waqti iyo boos halka carruurtu ku muujin karaan barashadooda ayna ku arki karaan wixii ka dhexeeya iyo xiriirka u dhexeeya kan jira iyo barashada cusub
- La qaybsadaan oo gudbiyaan aqoonta ku saabsan barashada carruurta ee goobeed iyaga oo gudbinaya mid kale, isdhaafsiga macluumaadka qoysaska iyo mihnadlayaasha oo dhinac kale ah
- Ku dhiirigeliyaan carruurta si ay ugala hadlaan fikradahooda iyo fahamkooda
- Fahmaan in aqoontu aanay ku xirnayn luqad mucayina, lahjad ama dhaqan

*Ku dar tusaalayaashaada adiga xaalladaada:*

NATIIJOOYINKA BARASHADA

## **NATIIJADA 4AAD:** CARRUURTU WAY ISKU KALSOON YIHIIN WAANA BARTAYAAL KA QAYBQAATA

**Carruurtu waxay bixiyaan waxay barteen iyaga oo ku xirmaya dadka, goobta, teknoolojiga iyo dabeecada iyo waxyaallaha la warshadeeyey**

**Tani waa caddaynta, tusaale ahaan, marka carruurtu:**

- Hawlgeliyaan barashada cilaaqaadaka
- Isticmaalaan dareenka si loo sahamiyo bay'adaha la dhisay kuwa dabiiciga ah
- Ay arkaan faaiidada iyo farxada sahaminta aqoonta la qaybsanayo
- Sahamiyaan ujeedada iyo siday u shaqayso farayaamada, warbaahinta, codadka iyo muuqaladu
- Hagaan macluumaadka si loo baaro, looga qaybqaato, la isklu xirxiro, loo ikhtiraaco loona dhiso
- Tijaabiso teknooloji kala duwan
- Isticmaasho macluumaad iyo teknoolojiga isgaarsiinta (ICT) si loo baaro loona xaliyo dhibaato
- Sahamiyaan fikrado iyo aragtiyo iyada loo isticmaalayo qiyaasid, hal-abuurnimo, iyo isticmaalida cayaar, isticmaalka aragtidooda iyo kuwa kale si dib loogu noqdo loona dhiso fikrada

**Barayaashu waxay kor u qaadaan barashada, tusaale ahaan, markay:**

- Siiyaan fursado iyo kaalmo carruurta si loo meel mariyo cilaaqaad waxbarasho oo macna samaynaya
- Siiyaan waaya-aragnimo ku dhisan sahamin dareen oo dabiici ah iyo kuwa la warshadeeyey
- Siiyaan waaya-aragnimo lug ku leh carruurta bulshada guud iyo bay'ada wixii ka baxsan habka ilmanimada hore
- Ka fekeraan si taxadaran sida carruurtu u wada ciyaarto oo la isugu daro, iyada oo la eegayo suurtagalnimada kaalmaynta dhalinyarada
- Baraan farayaamada ku haboon, teknoolojiga iyo warbaahinta oo siiyaan xirfado, aqoon iyo farsamo si loo wanaajiyo barashada carruurta
- Siiyaan fursadaha carruurta si ay wax uga dhisaan ugana qaybqaataan qalabka istaraatiijiya waxbarasho ahaan
- Ku dhisaan kalsoonidooda teknooloji ay ku heli karaan carruurtu goobta
- Siiyaan macluumaad ku dhiirigelaya carruurta inay matalaan waxay aaaminsan yihiin

*Ku dar tusaalayaashaada adiga xaalladaada:*

NATIIJOOYINKA BARASHADA



## NATIIJADA 5AAD:
## CARRUURTU WAA LA XIRIIRAYAAL WANAAGSAN

Wadaxiriirku muhiim ayuu u yahay lahaansahaha, ahaanshaha iyo noqoshada. Laga soo bilaabo dhalashada ilmaha waxay la xiiriiran kuwa kale iyaga oo isticmaalaya jir-ka-hadal, dhawaaq, luqad iyo wada xiriir la caawimay. Waa bulsho ahaansho kuwaas oo asal ahaan u samaysan inay isdhaafsadaan fikrado, aragti, su'aallo dareen, iyo inay isticmaalaan farayaamo kala duwan iyo warbaahin, uu ku jiro muyuusig, dhaansi iyo maaweelo, ay ku sharxaan naftooda, ay ugu xirmaan kuwa kale kuna fidiyaan waxbarashadooda.

Isticmaalida carruurta luqadooda waxay kaalmaysaa dareenkooda aqoonsi iyo horumarkooda siday wax u rakaan. Carruurtu waxay dareemaan lahaanshaha marka luqadooda, hanaanka is dhexgalka iyo siyaallaha la xiriirida la qiimeeyo. Waxay xaq u leeyihiin inay sii wataan isticmaalayaasha luqadooda iyo weliba inay horay u mariyaan aqoonta Mustawaha Ingiriiska Australia.

Awooda farbarashada iyo tirabarashada waa arrin muhiima oo wada xiriirka, muhiim ayayna u tahay waxbarasho guul leh dhamaan manaahijta.

Awooda farbarashada iyo tirabarshada, kalsoonida iyo dabeecada si loo isticmaalo luqada dhamaan qaababkeeda kala duwan. Farbarashadu waxay ka kooban tahay waxyaalla badan oo wada xiriir kuwaas oo ay ku jiraan muyuusig, dhaqdhaqaaq, dhaansi, sheeka-sheegid, farshaxan, warbaahin iyo maaweelo, iyo weliba hadal, dhegaysi, daawasho, akhris iyo qoritaan. Qoraallada casriga ah waxaa ku jira elektaroonik iyo daabacaad ku salaysan warbaahinta. Adduunka leh teknooloji sii siyaadaya, awooda si dhab ah loogu taxliiliyo qoraalka waa qaybta ugu weyn farbarashada. Carruurtu waxay ka faaiidaystaan fursadaha si loo sahamiyo adduunkooda iyada oo la isticmaalayo teknooloji laguna hormarinayo kalsoonida iyada oo la isticmaalayo warbaahinta dhijitaalka ah.

Tirabarashadu waa awooda, kalsoonida iyo dabeecada loo isticmaalo xisaabaadka nolol maalmeedka. Carruurtu waxay keenaan faham xisaabeed iyaga oo u isticmaalaya xalin mas'alo. Waa lagama maarmaan fikrada xisabaad oo carruurta yaryari ku dhaqmaan waa wax jira oo macna samaynaya xaallada noloshooda hadda ah. Barayaashu waxay u baahan yihiin erayo qani ah oo xisaabeed iyo inay kaalmeeyaan horumarka tirabarashada. Dareenka qaabka xisaabta, qaabka iyo astaanta iyo sahaminta adduunka xisaab ahaan ayaa ah fikrada xisaabaad oo aad u weyn oo carruurtu u baahan tahay inay xisaabiso.

Waaya-aragnimada goobta ilmanimada hore waxaa loo dhisaa waaya-aragnimo leh luqad, farbarasho iyo tirabarasho carruurtu ay leeyihiin qoyska dhexdiisa iyo bulshada.

Dabeecada wanaagsan iyo aqoonta farbarashada iyo tirabarashada ayaa muhiim u ah carruurtu inay ku guulaystaan barashada. Asaaska aqoontaan waxaa la dhisaa ilmanimada hore.

## **NATIIJADA 5AAD:** CARRUURTU WAA LA XIRIIRAYAAL WANAAGSAN

- Carruurtu waxay la macaamilaan hadal iyo hadal la'aanba kuwa kale ujeedooyin kala duwan
- Carruurtu waxay hawlgeliyaan qoraalla kala duwan waxayna ka hellaan macnayaal qoraalladaas
- Carruurtu waxay muujiyaan fikradooda waxayna macne ka sameeyaan erayo badan
- Carruurtu waxay bilaabaan inay fahmaan waxaana shaqeeya nadaamka astaamaha iyo calaamadaha
- Carruurtu waxay isticmaalaan macluumaad iyo teknoolojiga wada xiriirka si ay u hellaan macluumaad, fikrada barista waxayna masalaan fekerkooda

**Qoraallada:**
waxyaallaha aan akhrino, aragno oo dhegaysano iyo kuwa aan abuuro si aan ula wadaagno macnaha. Qoraallada waxay ahaan karaan qoraal ku salaysan, sida buugta, magaasiinada iyo boostarada ku salaysan iskiriinka, tusaale ahaan goobaha internet-ka iyo DVDS-ka. Qoraalla badan ayaa leh moodala badan, muuqalla isku-dhafan, erayo qoran iyo/ama dhawaaq.

**Aqbalsiin:**
"waxa la isla ogol yahay waxaa ka mid ah isku xirida xaalladaha maskaxda waqtiyada hawlgelinta, mudadaas ay saamayso waxaa lagu wada xiriiraa wajiga, codka, jir-ka-hadalka iyo ka-wada-xiriirka indhaha (Siegel, 1999).

# **NATIIJADA 5AAD:** CARRUURTU WAA LA XIRIIRAYAAL WANAAGSAN

## Carruurtu waxay la macaamilaan hadal iyo hadal la'aanba kuwa kale ujeedooyin kala duwan

**Tani waa caddayn, tusaale ahaan, marka carruurtu:**

- Ay sameeyaan isdhexgal farxad leh iyaga oo isticmaalaya luqad hadal ah iyo mid aan hadal ahayn
- Ay gaarsiiyaan farriin wax ku oolla oo leh ujeedo iyo kalsooni, farbarasho ku salaysan bulshada iyo qoyska/guriga
- Wax uga qabtaan af ahaan iyo ficil ahaan waxay arkaan, maqlaan, taabtaan, dareemaan oo dhadhamiyaan
- Isticmaalaan luqad iyo wax u taagan cayaar, muyuusig, farshaxan si ay wadaagaan mashruuc macane samaynaya
- Ku biiriyaan fikradahooda iyo waaya-aragnimadooda cayaar, wada hadal koox ballaaran iyo mid yar
- Ka qaybgalaan oo siiyaan calaamado dhaqan inay dhegaysanayaan fahmayaana wixii lagu yiraahdo iyaga
- Waa la xiriirayaal madaxbanaan kuwaas oo abaabula Mustawaha Ingiriiska Australia iyo kuwada sheekaysiga luqada guriga waxayna muujiyaan awooda wax looga qabto baahida dhegaystayaasha
- Waxay la macaamilaan kuwa kale si ay u sahamiyaan fikradaha iyo aragtiyaha, u caddeeyaan ugana loolamaan, uga gorgortamaan dadkana ula wadaagaan faham cusub
- Gaarsiiyaan oo dhisaan farrima cusub oo leh ujeedo iyo kalsooni, ku dhisan farbarashada guriga/qoyska iyo bulshada guud
- Isdhaafsadaan fikrado, dareen iyo faham iyaga oo isticmaalaya luqad iyo wax matalaya cayaarta
- Muujiyaan faham siyaadaya oo qiyaaseed erayo nambar lagu muujinayo si loo qeexo baaxada, dhererka, mugga iyo intuu qaado iyo magacyada iyo nambarka
- Muujiyaan fikrado iyo dareen iyo faham waxayna ixtiraamaan sida kuwa kale wax u arkaan
- Isticmaalaan luqad lagu gudbiyo ka fekerida cadadka si loogu sharxo waxa u taagan sheyga iyo xulka, laguna sharxo fikrada xisaabeed
- Waxay muujisaa aqoon siyaadaysa, fahamka iyo xirfada lagu gudbiyo macnaha hal luqadeed

**Barayaasha waxay kor u qaadaan, tusaale ahaan, markay:**

- Hawlgeliyaan isdhexgal lagu farxi karo ee carruurta markay sameeyaan oo ku cayaaraan dhawaaq
- Ogolaadaan kana jwaabaan si taxadar leh kuna haboon carruurta da'daalkooda si ay ula xiriiraan
- Dhegaystaan ayna wax ka yiraahdaan carruurta qiyaastooda erayada
- Qiimeeyaan hidaha luqada carruurta iyo qoyska iyo xubnaha bulshada lagu dhiirigeliyo isticmaalka iyo yeelashada luqada guriga lagaga hadlo iyo Mustawaha Ingiriiska Australia
- Aqoonsadaan in carruurtu ay galaan barnaamijka ilmanimada hore ayagoo bilaabaya inay la xiriiraan ayna macne ka sameeyaan khibradooda guriga iyo bulshadooda
- U qaabeeyaan luqada kuna dhiirigeliyaan carruurta inay is-muujiyaan xaallada kala duwan iyo ujeedooyin kala duwan
- Sameeyaan wada xiriirid joogto ah ee carruurta ee ku saabsan fikradaha iyo waaya-aragnimada, waxayna fidiyaan erayadooda
- Ku daraan macluumaadka nolosha runta ah si kor loogu qaado isticmaalka carruurta ee luqada carruurta

*Ku dar tusaalayaashaada adiga xaalladaada:*

NATIIJOOYINKA BARASHADA

## **NATIIJADA 5AAD:** CARRUURTU WAA LA XIRIIRAYAAL WANAAGSAN

### Carruurtu waxay hawlgeliyaan qoraalla kala duwan waxayna hellaan macne qoraalkaan

**Tani waa caddayn, tusaale ahaan, markay carruurtu:**

- Dhegaystaan waxna ka qabtaan dhawaaqa iyo astaamaha hadalka, sheekooyinka iyo laxanka mawduuca
- Daawadaan oo dhegaystaan wixii qoran, muuqda iyo qoraalla kala duwan ugana jawaabaan si ku haboon, ficilo, fikrad dhiibasho iyo/ama su'aallo
- Ku heesayaan kuna luuqaynaya laxano, sharqan iyo heeso
- Qaataan doorarka istimaalayaasha farbarashada iyo tirabarashada cayaartooda
- Bilaabaan inay fahmaan aragtida ugu muhiimsan ee farbarashada iyo tirabarashada iyo inay ku socdaan, sida dhawaaqa luqada, cilaaqaadka dhawaaqa xarafka, aragtida daabacaada iyo siyaallaha qoraalku u qaabaysan yahay
- U sahamiyaan qoraalka siyaalla kala duwan una bilaabaan inay taxliiliyaan macnaha
- Si firfircoon u isticmaalaan, waxna ugu sameeyaan siyaalla kala duwan qoraalka iyo luqada lana qaybsadaan farxada
- U aqoonsadaan waxna uga qabtaan si qoran iyo si af ah oo dhaqanka ku salaysan loo dhisay

**Barayaashu waxay kor u qaadaan barashadan, tusaale ahaan, markay:**

- Akhriyaan oo wadaagaan buugaag kala duwan iyo qoraalla carruurta ah
- Siiyaan bay'ad qani ku ah farbarasho ay ku jiraan soo bandhigida luqada guriga lagaga hadlo iyo Mustawaha Ingiriiska Australia
- Ku heesayaan kuna luuqaynaya laxano, sharqan iyo heeso
- Carruurta ku hawlgeliyaan cayaar iyo erayo iyo dhawaaqyo
- Si waadax ah uga hadlaan aragtida sida laxanka iyo xarfaha iyo dhawaaqyada marka lala wadaagayo qoraallo carruurta
- Ku darayaan qoraalla bulshada iyo qoysaska la yaqaan waxayna sheegaan sheekooyin
- Ka qaybgalaan cayaarta carruurta xagga sheekaysiga wixii ku saabsan macnaha muuqaalka iyo wixii daabacan
- Carruurta ka qaybgeliyaan wada hadal ku saabsan buugaag iyo qoraalla kale oo kor u qaada qadarinta rajooyin kala duwan
- Kaalmeeyaan carruurta si ay u taxliiliyaan siyaalla kala duwan oo qoraalla loo dhiso si loo qadimo aragti mucayina lana iibiyo badeeco
- La baro farshaxanka luqad ahaan iyo sida farshaniintu u isticmaalaan sheeyada iyo mabaadiida lagu dhiso qoraallada warbaahinta/dhaansiga/ muyuusiga/ muuqaalka
- La siiyo fursado carruurta si loo qabto qoraal loo qaabeyey si ku salaysan hab la yaqaan iyo mid aan la aqoon oo dhaqan la xiriira

*Ku dar tusaalayaashaada adiga xaalladaada:*

**Farbarashada:**
sanadaha hore farbarashada waxaa ka mid ah qaabab badan oo wada xiriir kuwaas oo ay ka mid yihiin muyuusig, dhaqdhaqaaq, dhaansi, sheeka sheegid, farshaxan, warbaahin iyo maaweello, iyo weliba hadlid, akhrin iyo qorid.

## **NATIIJADA 5AAD:** CARRUURTU WAA LA XIRIIRAYAAL WANAAGSAN

### Carruurtu waxay cabiraan fikrado waxayna sameeyaan macnayaal iyaga oo isticmaalaya warbaahinta

**Tani waa caddayn, tusaale ahaan, marka carruurtu:**

- Isticmaalaan luqad kana qaybgalaan cayaar lagu malaynayo laguna abuurayo doorar, qoraallo iyo fikrado
- La wadaagaan sheekooyin iyo astaamo dhaqankooda ah waxayna la jaanqaadaan sheekooyin la yaqaan
- Waxay isticmaalaan farashaxan sida sawiro, ranjiyeyn, wax qorid, maaweello, dhaansi, dhaqdhaqaaq, muyuusig iyo sheeko sheegid si loogu muujiyo fikrado macnana loogu sameeyo
- Tijaabiyaan siyaalla lagu muujiyo fikrado iyo macne iyada oo la isticmaalayo warbaahin kala duwan
- Waxaa la bilaabaa isticmaalka muuqaalka iyo qiyaasida xarfaha iyo erayada si loogu gudbiyo macne

**Barayaashu waxay kor u qaadaan barashadaan, tusaale ahaan, markay:**

- ku dhisaan waaya-aragnimada qoyska carruurta iyo bulshada farshaxan muuqda oo leh hal-abuur
- siiyaan macluumaad kala duwan kaas oo u suurtagelinaya carruurta inay muujiyaan macne iyada oo la isticmaalayo farshaxan, dhaansi, daraama iyo muyuusig
- weydiiyaan kana jawaabaan inta wax la akhriyayo ama ka wada hadalka buugta iyo qoraallada kale
- siiyaan macluumaad ku dhiirigelinaya tajrubada humaaga iyo wixii daabacan
- barayaan carruurta xirfado iyo farsamo wanaajinaysa awoodooda is-muujinta iyo wada-xiriirka
- ka qabygalaan cayaarta carruurta iyo la dhisida waxyaallo sida calaamadaha ballaariya cayaarta oo wanaajiya barashada farbarashada
- ka jawaabayaan ama wax ka oranayaan humaaga iyo astaamaha, ka hadlayaan waxyaallo, mabaadii, xirfado iyo farsamooyin ay isticmaaleen si loo gudbiyo macne.

*Ku dar tusaalayaashaada adiga xaalladaada:*

NATIIJOOYINKA BARASHADA

## **NATIIJADA 5AAD:** CARRUURTU WAA LA XIRIIRAYAAL WANAAGSAN

### Carruurtu waxay bilaabaan inay fahmaan sida astaamaha iyo nadaamku u shaqeeyo

**Tani waa caddayn, tusaale ahaan, marka carruurtu:**

- Isticmaalaan calaamadaha marka la cayaarayo si ay wax matalaan macnana u sameeyaan
- Bilaabaan inay sameeyaan isku xir u dhexeeya waxayna ka arkaan astaamo dareenkooda, fikradooda, erayadooda iyo falalkooda iyo kuwa kale kuwooda
- Dareemaan oo saadaaliyaan astaamaha waxyaallaha joogtada u dhaca iyo waqtiga gudbaya
- Yeeshaan faham calaamadahiisu yihiin isgaarsiin aad u xoogan iyo in fikradaha, aragtiyaha iyo sida loo arkaa ay iyaga u taagnaan karaan
- Bilaabaan inay ogaadaan cilaaqaadka u dhexeeya hadal, qoraal iyo tusaale muuqda
- Bilaabaan aqoonsiga astaamaha iyo cilaaqaadka u dhexeeya iyaga
- Bilaabaan kala saarida, kala gurida iyo isbarbardhigida xulalka iyo munaasabadaha macnaha uu ku fadhiyo sheyga iyo qalabka, adduunkooda bulsho iyo dabeecadeed
- Dhegaysiga iyo wax ka qabashada dhawaaqa iyo astaamaha hadalka, sheekada laxanka
- Soo xasuustaan siday isugu xigtay si loo dhamaystiro hawl
- Soo qaadashada waaya-aragnimadooda xagga dhisida macne isticmaalaya calaamado

**Barayaashu waxay kor u qaadaan barashadaan, tusaale ahaan, markay:**

- Ku soo jiitaan dareenka carruurta astaamaha iyo calaamadaha bay'adooda kana hadlaan astaamo iyo cilaaqaad, ay ku jiraan cilaaqaadka u dhexeeya xarfaha iyo dhawaaqa
- Siiyaan carruurta sidii ay ku heli lahaayeen qalab maalmeed kala duwan oo ay u isticmaali karaan astaamo kuna kala saaraan, ku kala guraan, dalbaan is barbardhigaan
- Hawlgeliyaan carruurta wada hadalka ku saabsan nadaamka calaamadaha, tusaale ahaan, xarfaha, nambarada, waqtiga, lacagta iyo sida muyuusigu u dhacayo
- Ku dhiirigeliyaan carruurta inay yeeshaan nadaamka calaamadahooda iyagana siiyaan fursadaha lagu sahamiyo nadaamyo calaamado dhaqan lagu dhisay

*Ku dar tusaalayaashaada adiga xaalladaada:*

**Tirabarashada:**
guud ahaan waxaa ka mid ah fahmida wixii ku saabsan nambarada, astaamaha, cabirida, ogaanshaha qiyaasta iyo xogta iyo weliba ka fekerida xisaabaadka, sababaynta iyo tirinta.

NATIIJOOYINKA BARASHADA

## **NATIIJADA 5AAD:** CARRUURTU WAA LA XIRIIRAYAAL WANAAGSAN

**Carruurtu waxay isticmaalaan macluumaad iyo teknolojiyada isgaarsiinta si ay u hellaan macluumaad, u baaraan fikrado una matallaan fekerkooda**

**Tani waa caddayn, tusaale ahaan, marka carruurtu:**

- Aqoonsadaan isticmaalka teknolojiga nolol maalmeedkooda ayna siticmaalaan teknoolojiga qiyaasta ah ama malaynta markay kaalmaynayaan cayaartooda
- Isticmaalaan macluumaad iyo teknolojiga isgaarsiinta ah si ay u hellaan humaag iyo macluumaad, una sahamiyaan aragtiyada kala duwan adduunkoodana macne ugu sameeyaan
- Isticmaalaan macluumaad iyo teknolojiga isgaarsiinta iyaga oo isticmaalaya farayaamada naqshadaynta, sawirida, dib u habaynta qoraalka, tarjumida xaallada isu keenida
- U hawlgeliyaan teknolojiga si loo hello fan macnana loogu sameeyo

**Barayaashu waxay kor u qaadaan barashadan, tusaale ahaan, markay:**

- Siiyaan carruurta teknoolojiga kala duwan
- Xoojiyaan teknolojiga carruurta cayaartooda iyo mashruucyada
- Baraan xirfado iyo farsamo kuna dhiirigeliyaan in carruurtu isticmaasho teknolojiga si loo sahamiyo macluumaad cusub ayna u matalaan fikradooda
- Dhiirigeliyaan barasho iskaashi leh oo ku saabsan teknolojiga inta u dhexaysa carruurta, iyo carruurta iyo barayaasha

*Ku dar tusaalayaashaada adiga xaalladaada:*

NATIIJOOYINKA BARASHADA

# ERAYBIXINTA ERAYADA

**Bay'ad barasho oo firfircoon:** bay'ad barasho oo firfircoon waa mid carruurta lagu dhiirigeliyo inay sahamiyaan lana dhaqmaan bay'ada si (ama loo dhiso) macne loogu sameeyo waaya-aragnimadooda, isdhexgalka bulshada iyo wadaxaajoodka kuwa kale. Bay'ad barasho oo firfircoon, barayaashu waxay cayaaraan door muhiima oo ay ku dhiirigelinaya carruurta si loo ikhtiraaco macne qota dheer oo ka dhigaya iskuxirka fikradaha u dhexeeya aragtiyaha, sida wax u socdaan iyo waxa u taagan. Tani waxay u baahan tahay in barayaasha lagu hawlgeliyo carruurta shucuur iyo ka fekerid. *(Waxaa laga soo qaatay South Australian Curriculum Standard Accountability (SACSA) Framework, General Introduction, pp10&11).*

**Kaalmo:** inaad awoodo inaad kala doorato iyo go'aano, si loo hago munaasabad iyo inaad saamayso qof adduunkiisa.

**Aqbalsiin:** "aqbalsiinta waxaa ka mid ah sixida xaallad maskaxeed waqti hawlgelineed, waqtigaas oo lagu gudbiyey codayn, ku-muujin waji, jir-ka hadal iyo il-ka hadal". (Siegel, 1999).

**Carruurta:** waxaa laga hadlayaa kuwa yaryar, gurbood iyo kuwa jira saddex ilaa shan sanadood, haddii aan si kale loo sheegin.

**Ka qaybgalka bulshada:** qaadashada door firfircoon wax ku biirinta bulshada.

**Wada-dhisida:** barashada dhacda marka carruurtu la macaamilaan barayaasha iyo carruurta kale markay wada shaqaynayaan si wadajir ah.

**Bulshooyinka:** mujtamaca ama kooxaha dhaqameed ama shabakadaha wadaaga ujeedo, hidoh, xuquuq iyo masuuliyaad iyo/ama wax kale oo isku xira. 'Bulshooyinka waxaa loo isticmaalaa inay xusaan, tusaale ahaan, bulshada goobta ilmanimada hore, qabaailka, bulshada isku meel jooga iyo bulshada guud ee Australia.

**Wax-ka-dhihid muhiima:** habka wax ka dhihida diirada saara wax ka iman kara sinaanta iyo cadaalada bulshada.

**Manhajka:** ilmanimada hore manhajkka macnihiisu waxa weeye 'dhamaan isdhexgalka, waaya-aragnimada, xarakaadka, munaasabadaha iyo waxyaallaha dhaca, kuwa la qorsheeyey iyo kuwa aan la qorshayn, kuwaas oo ka dhaca bay'ad loogu talagalay inay kobciso barashada ilmaha iyo koritaanka. [Waxaa laga soo qaatay Te Whariki].

**Dabeecadaha:** inta lagu jiro dabeecada maskaxda iyo ficilada, rabitaanka wax uga qabashada siyaalla mucayina, tusaale ahaan, lahaanshaha amal mustaqbil, ahaanta doonista inaad ku da'daasho, waajihida khibrada cusub si kalsooni leh.

**Goobta ilmanimada hore:** daryeelka maalinta oo dhan ah, daryeelka marmar ah, daryeelka maalmeed ee qoyska, adeegyada carruurta Aborjinaalka ee ujeedooyinka badan, dugsiga ka hor iyo kindergartenka, kooxaha wada cayaara, bandhiga, goobaha faragelinta hore iyo adeegyada la midka ah.

Barayaasha: dhakhaatiirta ilmanimada hore kuwaas oo si toosa ula shaqeeya carruurta ku jirta ilmanimada hore.

**Ka mid ahaanshaha:** waxay khusaysaa ku xisaabtanka dhamaan carruurta dhinaca bulshada, dhaqanka iyo luqadaha kala jaadnimadooda (waxaa ka mid ah hanaanka barashada, awooda, iimaha, jinsiga, xaalladaha qoyska iyo goobta) habka go'aan ka gaarida manhajka. Ujeedadu waa in la xaqiijiyo in dhamaan carruurta la aqoonsado lana qiimeeyo. Ujeedadu waxay kaloo tahay in la xaqiijiyo in dhamaan carruurtu leeyihiin helitaan siman oo macluumaadka iyo ka qaybgalka, iyo fursadaha si loo muujiyo barashadooda loona qiimeeyo faraqa.

**Barid ula kac ah:** waxaa qabanaya barayaal si ula kac ah wax u samaynaya, ujeedo leh kana fekeraya ficilkooda iyo go'aanadooda. Barida ula kaca ahi waa caksiga wax u barida si caadi ah ama u sii wadida sidii caadiga ahayd sababtoo ah sidaas ayaa had iyo jeer loo samayn jiray.

**Lug-ku-yeelashada:** waa xaallad adag, xarakaad ka soo go'day maskaxda, oo ay ka muuqato feejignaan aan kala go'lahayn iyo rabitaan biya-kama dhibcaana. Carruurta aadka ugu lugta leh (iyo dadka waaweyn) waxay wax u qabtaan inta karaankooda ah, iyagoo keenaya siyaalla bedelan oo wax looga qabanayo iyo faham u keenaya barasha heer wax qabanaya (waxaa laga soo qaatay laevers, 1994).

Lug-ku-yeelashada carruurta waxaa laga garan karaa wajigooda, codka iyo muuqaalka shucuurta, tamarta, taxadarka iyo daryeelka ay dabakhaan iyo hal abuurka baaxada ay keenaan xaallada. (Laevers) ) A state of flow Csikszentmihayli cited in Reflect, Respect, Relate (DECS 2008).

**Barashada:** hab dabiici ah oo sahamina oo carruurtu ku hawlan yihiin laga bilaabo barashada markay ballaariyaan garashadooda, jireed, bulsho, shucuureed iyo awooda hal-abuurka. Barashada hore waxay si dhow ula xiriirtaa koritaanka hore.

**Qaabka guud ee barashada:** tuse muujinaya hadafyada guud ama natiijooyinka barashada carruurta iyo sida lagu hello. Waxay siisaa kaalmo si wax loogu qabto goobta ilmanimada hore si ay ugu koraan siday rabaan, manhaj faahfaahsan oo intaas ka badan.

**Natiijooyinka barashada:** xirfada, aqoonta ama dabeecada barayaashu si firfircoon kor ugu qaadi karaan goobta ilmanimada hore, iyada oo lala shaqaynayo carruurta iyo qoysaska.

**Cilaaqaadka barashada:** cilaaqaadku wuxuu sii xoojiyaa barashada carruurta iyo koritaanka. Dadka waaweyn iyo carruutuba waxay rabaan inay wax kala bartaan.

**Farbarashada:** sanadaha hore farbarashada waxaa ka mid ah habab badan oo wada-xiriirka ah kuwaas oo ay ku jiraan muyuusig, xarakaadka, dhaansiga, sheeka-sheegida, farshaxanka muuqaalka, baahinta iyo maaweelida, iyo weliba hadlida akhriska, iyo qoritaanka.

**Tirabarashada:** guud ahaan waxaa ku jira fahamka wixii ku saabsan nambarada, astaamaha, cabirka, ogaanshaha cabirka iyo weliba ka fekerida xisaabaadka, sababaynta iyo tirinta.

**Waxbarashada:** hawlqabadku looga jeedo in kor loogu qaado barashada carruurta.

**Waxbarasho:** barayaasha ilmanimada hore ee hawlqabadka mihnadlaha, khaasatan xaalladahaas dhisida iyo nafaqaynta cilaaqaadka, go'aanka manhaj samaynta, barida iyo barashada.

**Barashada ku salaysan cayaarta:** arrinta barashada taas oo carruurtu qabanqaabiso macnana u samayso adduunkooda ijtimaciga ah, markay si firfircoon ula xaallayaan dadka, sheyga iyo matalaada.

**Ka-jawaabcelin:** ogaanshaha soo koraya ee carruurta ee siyaallaha waaya-aragnimadooda, xiisahooda iyo waxay aaminsan yihiin qaabeeyaan fahamkooda

**Kaalmaynta:** barayaashu go'aankooda iyo falalka ku dhisan ilmaha aqoontiisa jirta iyo xirfadaha lagu hormarinayo barashadooda.

**Ruuxi:** wuxuu khuseeyaa waaya-aragnimada aadamiga oo ay ku jiraan dareen layaab iyo fajac leh, iyo sahamin ahaansho iyo ogaansho.

**Teknoolojiga:** waxaa ka mid ah wax ka badan kumbuyuutaris iyo dhijitaal teknoloji loo isticmaalo macluumaadka, isgaarsiinta iyo maaweelinta. Teknolojigu waa badeecooyin kala duwan kuwaas oo ka kooban adduun naqshadaysan. Badeecadani way dhaafsiisan tahay sawirgacmeed loo naqshadeeyey loona sameeyey dad ayna ku jirto habayn, nadaam, adeegyo iyo bay'ada.

**Qoraallada:** waxyaallaha aan akhrino, aragno, dhegaysano aana abuuro si loo wadaago macnaha. Qoraalku wuxuu ahaan karaa mid ku salaysan qoritaan, sida buugta, magaasiinada iyo boostarada ama mid ku salaysan iskiriinka, tusaale ahaan goobaha internet-ka iyo DVDS-ka. Qoraalla badan ayaa ah kuwa noocya leh moodala kala duwan, muuqaalla iskudhafan, erayo qoran iyo/ama dhawaaq.

**Kala-guur:** habka laga tegaya inta u dhexaysa hab ku salaysan guriga iyo ilmanimada, inta dhexaysa hab ilmanima hore oo aad u kala duwan, ama hab ilmanimo ilaa waqti buuxa oo dugsi ah.

**Samaqabka:** samaqabka dhawaaqu wuxuu ka yimid qanacsanaanta baahida asaaska ah – baahida debecsanaanta iyo u riyaaqida, amaanka iyo waadaxnimada, aqoonsiga bulshada; dareemida ku-filnaansho hawl, baahi jireed iyo macnaha nolosha (waxaa laga soo qaatay Laevers 1994). Waxaa ka mid ah farxada iyo qanacsanaanta, shaqayn bulsho oo wax ku oolla iyo dabeecada rajadoonka, furfurnaanta, dhugdhugasho, iyo la-qabsi ama ka doorsasho.

# BIBLIYOGARAFIGA QORAALKA

Bailey, D. B. (2002). Are critical periods critical for early childhood education? The role of timing in early childhood pedagogy. *Early Childhood Research Quarterly, 17*, 281-294.

Brooker, L., & Woodhead, M. (Eds.). (2008). *Developing positive identities*. Milton Keynes: The Open University.

Fleer, M., & Raban, B. (2005). *Literacy and numeracy that counts from birth to five years: A review of the literature.* Canberra: Department of Education, Science and Training.

Carr, M. (2001). *Assessment in early childhood settings: learning stories.* London: Paul Chapman.

Department of Education and Children's Services (2008). *Assessing for Learning and Development in the Early Years using Observation Scales: Reflect Respect Relate*, Adelaide: DECS Publishing.

Department of Education Training and Employment (2001). *South Australian Curriculum, Standards and Accountability Framework*, Adelaide: DETE Publishing.

Gammage, P. (2008). *The social agenda and early childhood care and education: Can we really help create a better world?* Online Outreach Paper 4. The Hague: Bernard van Leer Foundation.

Grieshaber, S. (2008). Interrupting stereotypes: Teaching and the education of young children. *Early Education and Development, 19*(3), 505-518.

Hertzman, C. (2004). *Making early child development a priority: Lessons from Vancouver*. Ottawa: Canadian Centre for Policy Alternatives.

Laevers, F. (1994). Defining and assessing quality in Early Childhood education. *Studia Paedagogica.* Leuven: Leuven University Press.

Lally, R. (2005). The human rights of infants and toddlers: A comparison of childcare philosophies in Europe, Australia, New Zealand and the Unites States. *Zero to Three* 43-46.

Mac Naughton, G. (2003). *Shaping early childhood: Learners, curriculum and contexts*. Maidenhead: Open University Press.

Martin, K. (2005). Childhood, lifehood and relatedness: Aboriginal ways of being, knowing and doing. In J. Phillips & J. Lampert (Eds.), *Introductory indigenous studies in education: The importance of knowing* (pp. 27-40). Frenches Forest, Sydney: Pearson Education Australia.

Ministry of Education, (1996). *Te Whãriki: He Whãriki Mãtauranga mõ ngã Mokopuna o Aotearoa/Early Childhood Curriculum*. Wellington: Learning Media.

Moss, P. (2006). Early childhood institutions as loci of ethical and political practice. *International Journal of Educational Policy, Research and Practice: Reconceptualizing Childhood Studies, 7*, 127-136.

OECD. (2006). *Starting Strong II: Early Childhood Education and Care*: OECD.

Petrie, P., Boddy, J., Cameron, C., Heptinstall, E., McQuail, S., Simon, A., et al. (2008). *Pedagogy - A holistic, personal approach to work with children and young people, across services*. London: Thomas, Coram Research Unit, Institute of Education, University of London.

Queensland Department of Education, Training and the Arts, 2008, *Foundations for Success - Guidelines for Learning Program in Aboriginal and Torres Strait Communities*, Queensland Government.

Queensland Studies Authority. (2006). *Queensland early years curriculum guidelines*. Brisbane: The State of Queensland.

Rogoff, B. (2003). *The cultural nature of human development*. Oxford: Oxford University Press.

Shonkoff, J., & Phillips, D. K. (2000). *From neurons to neighbourhoods: The science of early childhood development.* Washington, DC: National Academies Press.

Siegel DJ, 1999:88, *Developing Mind,* Guilford Press, New York.

Siraj-Blatchford, I., & Sylva, K. (2004). Researching pedagogy in English pre-schools *British Educational Research Journal, 30*(5), 712-730.

Sylva, K., Melhuish, E., Sammons, P., Siraj-Blatchford, I., & Taggart, B. (2004). *The Effective Provision of Pre-school Education: The final report.* London: DfES Sure Start Publications & The Institute of Education.

Uprichard, E. (2007). Children as 'being and becomings': Children, childhood and temporality. *Children & Society, 22*, 303-313.

Wood, E. (2007). New directions in play: Consensus or collision. *Education 3-13, 35*(4), 309-320.

Woodhead, M., & Brooker, L. (2008). A sense of belonging. *Early Childhood Matters* (111), 3-6.